| | | |
|---|---|---|
| ***DOWLAD PUN TLAND*** <br> ***EE SOOMAALIYA*** | | ***PUNTLAND GOVERNMENT*** <br> ***OF SOMALIA*** |
| ***Wasaaradda Arrimaha Gudaha, D/hoose & Horumarinta Reer Miyiga.*** <br> ***Ministry of interior, Local Government & Rural Development.*** | | |
| ***Ref:XW/WAG/DH/HRM/036/010*** | ***Garowe office*** | ***Date: 21 March,2010*** |

# Dawladda Hoose
# Tilmaamaha Habka Waxgadashada
# Dawladda Puntland

## FINAL

***21 March,2010***

## Tusaha buugga

1. HORDHAC……………………………………………………………………………….7

1.1. HORDHACA & UJEEDADA TILMAAMAHA……………………………………….7

1.1.1. Hordhac ……………………………………………………………………….7

1.1.2. Ujeedada tilmaamaha ……………………………………………………….8

1.1.3. Saameynta ……………………………………………………………………….8

1.2. KA TEGIDDA TILMAAMAHA……………………………………………………..9

1.3. DIB-UGU-NOQOSHADA TILMAAMAHA………………………………………….10

1.3.1. Sababaha dib-ugu-noqoshada……………………………………………………10

1.3.2. Codsiga dib-ugu-noqoshada………………………………………………………10

1.4. MABAAD'DA WAXGADASHADA DADWEYNAHA……………………………10

1.5. DAHSOONAAN LA'AANTA, XILKASNIMADA, IYO DHAQANKA…….11

1.6. XEERKA DHAQANKA ……………………………………………………………..11

1.6.1. Mabbad'da dhaqanka……………………………………………………………11

1.6.2. Danaha iska hor imanaya…………………………………………………………12

1.6.3. Sirta & xogta sugan…………………………………………………………………12

1.6.4. Tartanka…………………………………………………………………………….12

1.6.5. Hadyadaha Ganacsig………………………………………………12

1.6.6. Soo dhaweynta……………………………………………………………………12

1.6.7. Wargalinta…………………………………………………………………………….13

1.6.8. Tusaalooyin dhaqan xumada ah………………………………………………13

1.7. WAAJIBAADKA MADAXDA DAWLADDA……………………………………….13

1.7.1. Sheegista danaha iska hor imanaya……………………………………………14

1.7.2. Mas'uuliyadaha saraakiisha…………………………………………………….14

1.7.3. Mas'uuliyadaha Ganacsatada gaarka ah……………………………………14.

1.8. CIQAABAHA KU DHAQAN LA'AANTA DHAQANKA WANAAGSAN……………15

1.9. KORMEERKA GUDAHA & MIDKA MADAXA BANNAAN……………………………16

2. MAS'UULIYADDA WAXGADASHADA……………………………………………………17

2.1. WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA (WAG)…………………………………………17

2.2. XOGHAYAHA FULINTA………………………………………………………………………17

2.3. GUDDIGA QANDARAASKA……………………………………………………………17

2.3.1. Maxay waxgadashadu muhiim ugu tahay xildhibaanada ?………………….18

2.3.2. Waa maxay doorka xildhibaanada ee waxgadashada? ……………………….18

2.3.3. Mas'uuliyadaha Guud ee Guddiyada qanadaraasyada…………………………20

2.3.4. Ansixinta guddiga qandaraaska……………………………………………………20

2.4. UNUGYADA WAXGADASHADA…………………………………………………21

2.5. WAAXYAHA ISTICMAALAHA/DALBADA……………………………………………22

2.6. GUDDIYADA FURIDDA QANDARAASYADA………………………………………… 22

2.7. GUDDIYADA QIIMEYNTA……………………………………………………………. .23

2.8. GUDDIYADA FATISHAADA/LA WAREEGIDDA…………………………………… 23

3. QAABABKA WAXGADASHADA……………………………………………………… . 24

3.1. QAABABKA WAXGADASHADA……………………………………………………… 24

3.2. QANDARAAS TARTAN FURAN………………………………………………………24

3.3. QANDARAAS XADIDAN…………………………………………………………………25

3.4. CODSI QIIMAYAAL……………………………………………………………………………25

3.5. MEEL KALIYA……………………………………………………………………………26

3.6. XAALAD QASAB AHA…………………………………………………………………27

3.7. WAXGADASHADA WADAAGA AH EE DAWLADDA & GANACSATADA…..27

3.8. KA QEYB-QAADASHADA BULSHADA EE WAXGADASHADA…………………..29

3.9. XULASHADA & SHAQA-GALINTA LA-TALIYAYAASHA..........29

3.9.1. Xulashada ku saleysan tayada & qiimaha.............................................................30

3.9.2. Xulashada ku saleysan Tayada...........................................................................30

3.9.3. Xulashada ku saleysan qiime Go'an....................................................................31

3.9.4. Xulashada ku saleysan qiimaha ugu yar.............................................................31

3.9.5. Xulashada ku saleysan aqoonta la taliyaha.........................................................32

3.9.6. Xulashada ku saleysan meel kaliya ..........................................................................32

3.10. NOOCYADA HESHIISYADA EE SHAQO-SIINTA LA TALIYAYAASHA..........32

3.10.1. Qandaraas Xaddi lacag ah (Qiime go'an) ..........................................................32

3.10.2. Qandaraas waqti ku saleysan.............................................................................33

3.10.3. Qandaraas khidmadda iyo/ama ku-talogal(Guul)......................................33

3.10.4. Qandaraas boqolkiiba ku xidhan.........................................................................33

3.10.5. Qandaraas adeegyo aan xaddidneyn (Heshiis qiime)..................................34.

3.11. ISTICMAALKA LA-TALIYAAL KALII-KALI AH....................................................34

4. QORSHEYNTA WAXGADASHADA & MIISAANIYADDA..............................35

4.1. QORSHEYNTA WAXGADASHADA

4.2. NIDAAMKA DIYAARINTA MIISAANIYADDA...................................................35

4.3. SHAQOOYINKA GUDDIGA QANDARAASYADA...............................................36

4.4. SHAQOOYINKA UNUGGA WAXGADASHADA

4.5. MADAXDA WAAXYAHA.........................................................................37

5. DIYAARINTA & ANSIXINTA DUKUMENTIGA QANDARAASKA.............................. 38

5.1. TILMAAMIDDA BAAHIYAHA

5.2. SIFAHA WAXYAABAHA LOO BAAHAN YAHAY

5.3. ANSIXINTA SIFAHA WAXA LA GADANAYO , QAABKA WAGADASHADA & DUKUMENTIGA QANDARAASKA

5.4. KU DHAWAAQIDDA TARTANKA

5.5. SOO BIXIDDA HORE EE TARTAMAYAASHA……………………………………………………………39

5.5.1. Shuruudah soo bixidda hore

5.5.2. Xayeysiinta soo-bixidda hore

5.5.3. Qiimeynta soo bixidda hore

5.6. BIXINTA DUKUMENTIGA QANDARAASKA……………………………………………………………………40

5.7. BIXINTA CASUUMADAHA TARATANKA XADDIDAN

5.8. CADDEYMAHA QNADARAASKA

5.9. KORDHINTA MUDADA UU XIDHMAYO TARTANKAU……………………………………………….41

5.10. JOOJINTA HAWSHA TARTANKA INTAAN LA FURIN QANDAASKA

6. QABASHADA WARAAQAHA TARTANKA & FURIDOODA…………………………..43

6.1. QABASHADA WARAAQAHA TARTANKA

6.2. FURITAANKA QANDARAASKA

6.3. JOOJINTA QANDARAASKA & QIIMAYAASHA KADDIB FURITAANKA

6.4. KORDHINTA MUDADA QANADARAASKA ……………………………………………………………….44

7. QIIMEYNTA & BIXINTA QANDARAASKA…………………………………………………………………..45

7.1. BALLAMINTA GUDDIGA QIIMEYNTA

7.2. QIIMEYNTA QANDAASLAYAASHA

7.3. U SOO BIXITAANKA KADDIB

7.4. WARBIXINTA QIIMEYNTA & TALO-SOO-JEEDINTA……………………………………………………..47

7.5. ANSIXINTA GUDDIGA QANDARAASKA EE SOO JEEDINTA BIXINTA QANDARAASKA……48

7.6. DIIDMADA DHAMMAAN QANDAASLAYAASHA

7.7. WADA-XAAJOODKA…………………………………………………………………………………………………..49

7.8. ANSIXINTA GUDDIGA QANDARAASKA EE DUKUMENTIGA QANDARAASKA……………..50

7.9. CABASHOOYINKA QANDARAASLAYAASHA……………………………………………………………….51

7.10. BIXINTA QANDARAASKA & SAXEEXA

8. MAAREYNTA QANDARAASKA. KEENISTA & LACAG BIXINTA………………………………….52

8.1. WAXTARKA QANDARAASKA

8.2. KORMEERKA QANDARASKA & MAAMULKA – QANDARAASYADA ALAABADA

8.3. KORMEERKA QANDARASKA & MAAMULKA -QANDARAASKA SHAQOOYINKA AH

8.3.1. Sheegashada shaqo dheeri ah & kordhinta waqtiga

8.3.2. Lacag bixinta shaqooyinka……………………………………………………………………………………………………53

8.3.3. Ka- heynta

8.4. KORMEERKA QANDARASKA & MAAMULKA - qandaraasyada adeegyada ah

8.4.1. Lacag bixinta Adeegyada

8.4.2. Waqtiyada lacag bixinta

8.5. HAWL SOCODKAQANDARAASKA ………………………………………………………………………………………54

8.5.1. Kormeerka la-taliye, Ganacsade ama waajibaadka qandaraasle

8.5.2. Kormeerka & gudashad waajibaadka degamada

8.5.3. Dib u dhaca hawsha

8.5.4. Xalinta khilaafaadka……………………………………………………………………………………………………..55

8.5.5. Baabi'inta qanadaraaska

8.6. WAX KA BEDELKA QANDARAASKA

9. WARBIXINTA WAXGADASHADA, KORMEERKA & QIIMEYNTA………………………………………56

9.1. WARBIXINTA WAXGADASHADA

9.2. KORMEERKA WAXGADASHADA & QIIMEYNTA

9.2.1. Hawlaha kale ee kormeerka & Qiimeynta ee WAG

9.2.2. Shaqooyinka Degmada……………………………………………………………………………………………..57

9.2.3. Doorka kormeerka ka-faa'idetstayaasha

# 1. HORDHAC

## 1.1. HORDHACA & UJEEDEDA TILMAAMAHAN

### 1.1.1.Hordhac

Waxgadashadu waa shaqooyinka muhuiimka u ah adeega dadweynaha . Si waxtar leh ee dhammeystiran in waaxyaha dawladda hoose ee muhiimka ahi u gaadhsiiyaan dadweynaha adeegyada & agabka, waxay ku xidhan tahay sida waxtarka leh ee ay u socot shaqada Waxgadashadu. Hadaba xoojinta nidaamka Tilmaamaha Waxgadashada ee dawladaha hoose ee Puntland ayaa wax weyn ku taraysa wanaajinta dawladnimada & gaadhsiinta adeegga.

Soo diyaarinta timaamaha Waxgadashada ee dawladaha hoose ee Puntland**,** waxay ku timid kaddib markii qiimeyn lagu sameeyey ttilmaamaha hadda ka jira degmooyinka**.** Waxyaabaha qiimeyntaas lagu soo ogaaday waxa ka mid ah: Liidasho ka jirta hay'adaha & qaabka sharciyeed, tilmaamo cad-cad oon jirin, Xilalka & mas'uuliyadaha dhinaca Waxgadashada oon la kala caddeyn, hufnaanshada (transparency ) & xilqaadnimada (accountability) oo liidata iyo iyada oon lagu baraarugsaneyn guud ahaan Tilmaamaha waxgadashada

Maqnaanshaha xirfad dhisan oo Waxgadasho & kala dhinaanshaha tababarka shaqaalaha ayaa keenay in la isticmaali waayo nidaam fiican oo Waxgadashada, taas oo dhalisa tayo xumo iyo kharashyo badan oo degmada ku yimaad. Faham la'aanta guud ee Tilmaamaha ama ku dhaqan la'aanta ayaa sii abuura musuqmaasuq, iyo qaab xumo loo isticmaalo hantida dadweynaha. Qaab xumada loo isticmaalo hantida dadweynaha waxa dhaliya dhibaatooyin la socda hawsha Waxgadashada –ka bilow qorshe xumo dhinaca Waxgadashada , qeexidda baahiyaha iyo diyaarinta dukumentigii qandaraaska, dahsoonan la'aan iyo Tartan la xidhiidha sida ogeysiiska loo sameeyo , tartanka, qiimeynta iyo bixinta qanadaraaska,ilaa kormeer xumada qandaraaska . Tilmaamo Waxgadasho oo waxtar leh iyo nidaam tallaabo-tallaabo ah ayaa loo baahan yahay, si loo caawiyo shaqaalaha degmada ee Waxgadashada si ay xilalkooda ugu gutaan si waxtar & tayo leh . Tilmaamahani waxay ku saleysan yihiin siyaabaha ugu fiiacan ee Waxgadashada dadweynaha , iyada oo loogu talagalay tallabo waqti gaaban ah oo lagu hagaajinayo Tilmaamaha Waxgadashada degmooyinka, inta la gaadhayo xalka waqtiga dheer oo ay ku jirto dib-u-hagaajinta dhammaan siyaabaha Waxgadashada ee dadweynaha taas oo qeyb ka ah dib u habeynta maareynta maaliyadda dadweynaha.

### 1.1.2 Ujeedada Tilmaamahan

Dukumentigani waxa laga helayaa mabaad'da, siyaasadaha iyo hababka loo raacayo Waxgadashada qalabka, shaqooyinka iyo adeegyada iyo bixinta(disposal) hantida ee dawladaha hoose Puntland.

Mabaad'daas, siyaasadahaas,iyo nidaamyadaas waxa loogu talo-galay iney:

a) Hoggaamiyaan hawsha waxgadashada;

b) Keenaan nidaam isku mid ah oo Waxgadashada alaabada, shaqooyinka iyo adeegyada;

c) Hubiyaan dahsoonaan la'aan & Xilkasnimo hawlaha oo dhan ka jirta , iyada oo la raacayo Tilmaamaha deeq-bixiyayaasha halkii looga baahan yahay;

d) Wanaajiso tayada iyo waxtarka shaqada;

e) Kobcinta ku dhaqanka joogtada ah ee Tilmaamaha Waxgadashada wanaagsan iyo mabaad'da caalamiga.

### 1.1.3 Saameynta

Tilmaamaha Waxgadashada waxay saameynayaan dhammaan hawlaha Waxgadashada degmooyinka Puntland. Marka Waxgadashada uu maalgelinayo deeqbixiye, tilmaamahu waxay saameynayaan kaliya marka ayna ka hor imaneynin heshiiska maalgalinta, tilmaamaha, hababka ama dukumentiga uu dalbanyo deeq-bixiyuhu. Haddiise uu ka hor imanayo kuwa deeq-bixiyaha , markaas waxa jiraya hababka & go'aamada deeq-bixiyaha.

Tilmaamahani waxay koobayaan qeybaha Waxgadashada , bilowga ilaa la keeno wixii la dalbaday ama shaqadii la qabto oo qandaraasku dhammaado. Tilmaamuhu waxay wax ka tarayaan in:

a) Meesha ay ka saarto ama yareyso in baahida in mar walba go'aamo cusub la gaadho oo ay yimaadaan xaalado isku mid ah.
b) Lagu shaqeeyo dukumenti qandaraas & habab isku mid ah dhamaan hawlaha Waxgadashada.
c) La helo bar laga qiyaas qaato si loo qiimeeyo hababka.

Ku dhaqanka hababka tilmaamahan si joogta ah , waxay waxtar u leedahay sidii loo gaadi lahaa Waxgadashada dawladaha hoose oo tayo wanaagsan, hufan , dukumenti & go'aamo mideysan leh, & yareynta kharashka.

Tilmaamahan waxa loogu talo galay in si joogto heerkooda kor loogu qaado, si ay ula saan qaadaan isbedellada sharciga , isbeddelada baahiyaha, xaaladaha ganacsiga, iyo qaadashada habab cusub oo la sii hagaajey, oo ay ku jirto ansixinta sharci cusub oo Waxgadashada iyo dib u habeyn qaabka hay'adaha ee dhinaca Waxgadashada iyada oo shaciga cusub la waafajinayo.

## 1.2 KA TEGGIDDA TILMAAMAHA

Ka teggidda tilmaamahani waxay ku iman kartaa sababaha soo socda:

a) Xaalada gaar ah, sida wax deg-deg ku yimaada (emergency);
b) Isticmaalka dukumenti qandaraas oo gaar ah marka Waxgadashada gaar ah(specialist) loo baahdo;
c) Sharci cusub ama isbedel jiyaasad dawladeed taas oo sababta in qeybo ka mid ah tilmaamahani la socon waayaan sharciga cusub ilaa dib loogu noqdo tilmaamha oo la ansixiyo.

Halka shaqo ama hab uuna la socon karin tilmaamahan, waa in loo ansixiyaa ka baydhis (xaalad gooni ah) ka hor intaan shaqadaas la qaban. Ka beydhista tilmaamahan lama ansixin karo hadday toos uga hor imanayaan:

a) Waxgadashada nidaamsan iyo dhaqanka wanaagsan; ama
b) Dastuurka Puntland, ama
c) Sharciga wadani ama Caalami ama heshiis caalami ah.

Ka beydhista tilmaamahani waa iney noqdaan mid waqti gaaban ah oo aan caadi aheyn. Haddiise ay soo noqnoqoto ku dhaqan waaga tilmaamahani , markaas Wasaaradda Arrimaha Gudaha ayaa go'aan ka gaadheysa in loo baahan yahay in tilmaamaha wax laga bedelo iyo in kale.

Haddiise ay lagama maarmaan noqoto ka badheydhistu, Guddoomiyaha guddiga qandaraaska ayaa u gudbinaya codsi WAG, isaga oo faahfaahinaya duruufaha iyo sababta codsiga. WAG si cad ayey u diidi kartaa ama u ogolaan kartaa iyada oo ku soo saareysa xaalad gaar ah.

Ke badheydhista & ogalaanshaha gaarka ah aad ayaa dib loogu eegayaa marka lagu jiro hawlaha kormeerka ee WAG, hantidhowka gudaha dawladda hoose iyo hanta dhowraha guud. WAG dib bey u eegeysaa codsiyada ka beydhista si ay u go'aamiso in loo baahan yahay in tilmaamaha wax laga bedelo.

## 1.3. DIB-UGU-NOQOSHADA TILMAAMAHA

### 1.3.1. Sababaha ku Noqoshada

Arrimaha soo socda ayaa keeni kara baahida ku noqoshada tilmaamaha:

a) Sharci cusub;
b) Isbedel siyaasadeed oo dawladeed;
c) Soo saarista siyaasado, habab iyo dhaqano la sii hagaajey,
d) Ka guurista siyaasado, habab iyo dhaqano gaboobay ; iyo
e) Waaya-aragnimada wixii horey loo qabtay.

### 1.3.2. Codsi ku noqosho ka yimaad Degmada

Marka ku noqoshada tilmaamaha loo arko lama huraan, codsi rasmi ah ayaa loo gudbinayaa WAG iyada oo la raacayo habkan soo socda:

a) Codsiga waxa diyaarinaya oo ansixinaya guddiga qandaraaska waxana ogolaanaya Xoghayaha fulinta.
b) Codsigu wuxuu caddeynayaa ujeedada ku noqoshada iyo sabab dhameystiran oo ay la socdaan waxa laga la bedelayo tilmaamaha oo cayiman .
c) WAG si rasmi ah ayey uga fiirsaneysaa codsi kasta, waxayna raadineysaa talo sharci iyo nidaam Waxgadasho , markaa wey ogolaan kartaa wax ka bedelka guud ee tilmaamaha, ogolaansho gaar ah ayaa la siinayaa Degmadii codsatey ama waa la diidi karaa ,iyada oo sababta raacineysa.

## 1.4. MABAAD'DA WAXGADASHADA DADWEYNAHA

Ujeedada guud ee nidaamka Waxgadashada dadweynahu waa in ay qiimo yeelato lacagta degmooyinku iyada oo la hubinayo in lacagta dadweynaha loo bixiyo si muuqata , waxtar leh oo sax ah. Tilmaamahani waxay xambaarsan yihiin siyaasaddii iyo habkii lagu horumarin lahaa tartan, cadaalad, dahsoonan la'aan, xilsanimo iyo dhaqan fiican , iyo lacag qiimo ku fadhida. Intaas waxa dheer iyada oo tilmaamahu ay siinayaan fursado ka qeyb galayaasha Waxgadashada ay cabasho ku gudbistaan haddii ay wax tirsanyaan. Dhammaan shaqaalaha dawladdu waxay ku dhaqmayaan siyaasadahaas iyo hababkaas oo ay la socoto aqoon xirfadeed iyo maareyn fiican .

## 1.5. DAHSOONAAN LA'AANTA, XILSASNIMADA, IYO DHAQANKA

Nidaamka Waxgadashadu wa inuu hubiyaa lacag qiimo ku fadhida oo ah Waxgadashada alaabada ,adeegyada iyo shaqooyinka. Ujeedada Nidaamkan Waxgadashada waa gadashada alaabo ,adeegyo iyo shaqooyin leh tayo sax ah, oo qiimo sax ah ku fadhiya, oo waqti munaasib ah la keenay oo meeshii ku habooneyd la geeyey iyada oo tartan furan loo marey. Degmooyinku waxay lagu aaaminey lacagtii dadweynaha si ay adeegyo ugu qabtaan dadweynaha. Isticmaalka lacagta dadweynaha waa lin lagu fuliyaa si aan dahsooneyn oo furan, oo u ogolaaneysa daneeyayaasha iyo dadweynaha iney ogaadaan xogta hawlaha Waxgadashada degmada, isla markaana ay helaan hab ay ku xakumi karaan ama ku baadhi karaan dacwooyinka Waxgadashada. Waliba, xeerarka Waxgadashada dadweynaha waa iney heli karaan dhinacyadii daneynayaani.

Tilmaamahani waxay dalbanayaan in:

a. Dhammaan saraakiisha iyo dadka ka shaqeeya Waxgadashada ay ka jawaabaan oo mas'uul ay ka noqdaan ficilladooda.;
b. Dhammaan Keenayasha (ganacsatada), qandaraaslayaasha iyo la-taliyayaasha in loola dhaqmo si siman iyo fursad isku mid ah oo ay ku heli karaan qandaraasyada;
c. Waxgadashada loo fuliyo sida ugu waxtar badan , iyada oo la dhowrayo mabaad'da lacag qiimo ku fadhida, dahsoonaan la'aan iyo caddaalad;
d. Maaliyadda loo isticmaalo ujeedooyinkii loogu talo galay kaliya.
e. Hab Waxgadasho oo munaasib ah oo lagu shaqeeyo;
f. Dhammaan xisaabaadka oo si sax ah loo ogolaado iyada oo qoraaladii caawineyey ay la socdaan,
g. Lacag qiimo ku fadhida waxa lagu caddeyn karaa iyada oo lays barbar dhigo sicirka suuqa iyo
h. Dhaqan sax ah oo habboon oo ay raacaan dhammaan shaqaalaha Waxgadashadu .

## 1.6. XEERKA DHAQAN

Mabaad'da xeerka dhaqanka ee qabanaya dhammaan saraakiisha Waxgadashada degmooyinka Puntland waa kuwan soo socda:

### 1.6.1. Mabaad'da dhaqanka

Shaqaalaha Degmadu uma isticmaali karaan awoodda xafiiska dano gaar ah Dano gaar ah waxa ka mid ah ka qaadashada ama ka codsiga qandaraaslayaasha ama ganacsatada hadda ama kuwa dambe wax kasta oo qiima leh taas oo uu la rabo xaaskiisa,waalidiintiisa, carruurtiisa , qaraabadiisa ama qof kale oo

uu ka helayo dan si toos ah ama si dadban.. Shaqaalaha Degmadu waa inuu ilaaliyaa oo uu kor u qaadaa sharafta Degmada isagoo/iyadoo:

a) Ku dhaqmaya heerka ugu sareeya ee daacadnimo iyo run sheegnimo dhinaca xidhiidhka uu la leeyahay Degmada uu ka shaqeeyo gudaheega ama dibaddeeda;
b) Ku shaqeeynaya heerka xirfadeed ee ugu sarreeya.;
c) U isticmaalaya maaliyadda iyo hantida kale ee uu mas'uulka ka yahay sida ugu faaiido badan Degmada; iyo
d) Raacaya sharciyada & xeerarka dawladda Puntland; raacaya dhaqanka la ogol yahay iyo waajibaadka qandaraasyada .

### 1.6.2. Dano iska hor-imanaya

Shaqaalaha Degmadu wuxuu caddeynayaa wixii dano gaar ah ee uu leeyahay taasi oo saameyn karta dhexdhexaadnimada wixii la xidhiidha shaqadiisa. Xaaladaha noocan ah qofkaasi kama qeyb-gali karo hawlaha qandaraaska.

### 1.6.3. Sirta iyo xogta sugan

Shaqaalaha Degmadu wuu dhowrayaa xogta sirta ah ee uu helo inta uu shaqeynayo, umana isticmaali karo xogtaas dano gaar ah ama inuu si sharci darro ah ugu faa'ideeyo qandaraasle ama ganacsade. Xogta uu bixiyo qofka shaqaaluhu marka uu shaqeynayo, waa inay noqotaa mid run ah, dhexdhexaad oon looga jeedin in cid lagu mara habaabiyo.

### 1.6.4. Tartan

Shaqaalaha Degmadu wuxuuu ula dhaqmayaa dhammaan qandaraaslayaasha iyo keenayaasha si caddaalad ah oo sax ah, wuxuuna ka fogaanayaa wax kasta oo hor joogsan kara tartan caddaalad ah.

### 1.6.5. Hadyadaha ganacsiga (business gifts)

Shaqaalaha dawladdu ma aha inuu ka qaato hadyado ganacsi adeeg-bixiyayaasha ama ganacsatada kuwa imika ama kuwa mustaqbalka, marka laga reebo hadyadaha aan qiimo badan laheyn ee loo baahan yahay sida taariikhaha ama xusuus qorrada.

### 1.6.6. Soo-dhaweynta (hospitality)

Shaqaalaha dawladdu wuu inuu iska ilaaliyo inuu aqbalo wixii soo dhaweyn ah ee ay u arki karaan dadka kale inay saameyn ku yeelan karto go'aamada shaqada.

### 1.6.7. Wargalinta (Reporting)

Shaqaalaha dawladdu waxa ku waajib ah inuu wargaliyo madaxdiisa ama hati-dhowrayaasha wixii dhaqan xumo ah ee ay la yimaadaan saaxiibadii, qandaraasle ama ganacsade.

### 1.6.8. Tusaalooyin dhaqan xumidda

**Tusaalooyinkan soo socda waa noocyada dhaqan xumadaee uu mamnuucayo xeerka dhaqanku:**

a) U bandhigidda qandaraaslayaasha xogta sirta ah si toos ah ama si dadban.

b) Kala sheekeysiga qandaraaslayaasha waxgadashada si ka baxsan xeerka Waxgadashada.

c) U eexashada ama faqooqidda qandaraasle ee dhinaca diyaarinta faahfaahinta farsamo ama heerarka ama qiimeynta qandaraaska.

d) Burburinta, dhaawicidda, qarinta,qaadista, ama wax ka bedelka dukumentiga rasmiga ah ee Waxgadashada .

e) Qaadashada ama weydiisiga qandaraaslayaasha lacag, kharash safar, cuntooyin, madadaalooyin, hadyado, tixgalinno, qiima-dhimis ama wax kasta oo qiime leh.

f) Kala hadal ama ka ogolaansho qandaraaslayaasha ama kuwa dambe shaqo mustaqbalka ah.

g) Ka codsiga qof shaqaale ah ama madaxda degmada ee ku shaqo leh Waxgadashada iney kuu jabiyaan xeerarka Waxgadashada dadweynaha.

h) Baal maridda caddeymaha ah in dhaqankii wanaagsanaa ay buriyeen janiyeen xubnaha gudiga qanadaraasyada, shaqaalaha dawladda ama wakiil degmo.

i) Iyada oon waxba laga soo qaadin marka qandaraaslayaasha ay ku kacaan waxyaabo sharci darro ah ama dhaqan xumo ah oo ay ka mid tahay iyaga oo sameeya ballanqaadyo soo jiidasho leh ama abaalmarin..

## 1.7. WAAJIBAADKA MADAXDA DAWLADDA

Mabaad’ida hoggaamineysa dhaqanka wanaagsan waxa ay yihiin: Caddaalad, Madax bannani iyo Daacadnimo . Dhaqanka wanaagsan waa inuu ku dhisnaado nidaam habboon. Madaxda Waxgadashadu waxa ku waajib ah inuu raaco dhaqanka wanaagsan iyo tilmaamaha lagu maamulo Waxgadashada dadweynaha . Nidaamka Waxgadashadu waa inuu u ogolaadaa ganacsatada, qandaraaslayaasha iyo la-taliyayaasha iney u tartamaan si caddaalad ah. Madaxda dadweynaha ee ku shaqada leh Waxgadashada ayaa ka mas’uul ah iney ilaaliyaan toosnaanta nidaamka Waxgadashada iyo ula dhaqanka si caddaalad ah ganacsatada, qandaraaslayaasha iyo la-taliyayaasha.

### 1.7.1. Sheegista danaha iska hor imanaya (Declaration of conflict of interest)

Iyada oo la eegayo danta caddaaladda iyo sinnaanshaha ee Waxgadashada, xubnaha guddiga qiimeynta qandaraaska waxa laga rabaa iney saxeexaan oo ay ku dhajaan caddeyn danaha iska hormimanaya mid kasta warbixinta qiimeynta ee ay ka qeyb-galaan oo ah sida soo socota:

*"Inta aan fulinayo shaqadeyda Guddiga qiimeynta, waxaan ilaalinayaa heerka ugu sarreeya ee dhaqanka wanaagsan:*

- ✓ *Aniga Waxa aan caddeynayaa wixii dano ah ee laga yaabo iney ka horyimaadaan shaqada ;*
- ✓ *Anigu ka qaadan maayo ganacsade ama mid mustaqbal ah. wax kaash ah, deyn, mahadnaq, hadyado, raaxeysi, soo dhaweyn ;*
- ✓ *Anigu waxaan hubinayaa in wixii xog ah ee la xidhiidha Waxgadashadan aan u hayo si sir ah.*
- ✓ *Sababo shakhsi ahi ma saaneyn doonaan doorashada ganacsadayaasha. "*

### 1.7.2. Mas'uuliyadaha madaxda

1.7.2.1 Xoghayaha Fulinta Degmada iyo madaxda waaxyaha Degmadu waxay leeyihiin mas'uuliyad ah:

a) Iney Siiyaan shaqaalaha amarro iyo tilmaamo , gaar ahaan meelaha shaqaaluhu ay u nugul yihiin in lagu dacweeyo musuq ama khiyaamo ;

b) Iney ku dhiiri-galiyaan shaqaalaha mabaad'da dhaqanka & ficilka wanaagsan iney raacaan iyo iney abuuraan jawi dahsoonaan la'aantu & furfurnaantu tahay heer caadiga ah.

c) Iney hubiyaan in dhammaan shaqaaluhu ku dhaqmaan awaamiirta iyo tilmaamaha, oo ay ku jiraan ilaalinta keydka qoraalada.

d) Iney sameeyaan heerka habboon ee u wakiilashada awoodda maaliyadda , iyaga oo hubinaya in awooduhu ay kala soocan yihiin iyo meertada xilalka..

#### 1.7.2.2 Shaqaalaha Degmadu waxay ka mas'uul yihiin :

a) Iney raacaan awaamiirta maamulka iyo habka tilmaamaha;

b) Iney foojignaadaan oo ay ka warbixiyaan wixii dhaqan xumo tilmaamaya ;

c) Iney talo ka weydistaan maareeyaha ama hanta-dhowraha wixii ka mashaakil ah ee ay la kulmaan.

### 1.7.3. Mas'uuliyadaha ganacsatada gaarka ah.

Ganacsatada gaarka ahi kama reebana mas'uuliyadda iney u dhaqmaan si wanaagsan, iyo si aan dahsooneyn hawlaha Waxgadashada degmooyinka. Farrriintan wxaaa lagu sii xoojisaa iyaga oo laga

doonayo qandaraaslayaasha iney saxeexaan caddeyn rasmi inta ayna ka qeyb-galin nidaamka Waxgadashada, taas oo ah:

*"Shirkadani waxay muhimmadda saareysaa qandaraas u dhaca si tartan ah, xor ah, oon ceeb laheyn. Waxa ay ku faraxsan tahay in ayna marna u soo bandhigeynin ballanqaad abaalmarineed madaxda dadweynaha, qaraabadooda, ama dadka ay la shaqeeyaan , si toos ah ama si dadban taas oo la xidhiidha qandaraaska, .*

*Shirkadani waxay leedahay siyaasad ka soo horjeeda musuqa iyo iney raacdo barnaamij ay ka mid yihiin tallaabooyinka loogu baahan yahay in oo lagu hubinayo in ballanqaadka halkan aan ku sameyno ay ku dhaqmi doonaan maareeyayaasha iyo shaqaalahu , iyo sidoo kale ciddii kasta oo kala shaqeysa shirkadan mashaariicda & qanadaraasyada Degmada. Dadkaas waxa ka mid ah wakiilada, la-taliyayaasha, koox wadaag ah & ganacsadayaal. Nuqulloo siyaasaddayada ka soo horjeeda musuqa ayaan halkan ku soo lifaaqney.*

*(Si kale: Shirkadani waxay sababta qanadaraaskan u soo saartey nuqul barnaamijkeeda inay ku dhaqmeyso xeerka ah oo ku lifaaqan , kaas oo ay ku jiraan tallabokasta oo loogu baahan yahay in lagu hubiyo in ballanqaadka shirkaddan ee ah ineyna bixineynin laaluush ay ku dhaqmaan maareeyayaasha iyo shaqaaluhu, iyo sidoo kale ciddi kale ee kala shaqeyneysa shirkaddan or qandaraasyada & mashaariicda Degmada. Dadkaas waxa ka mid ah wakiilada, la-taliyayaasha,koox la-wadaag ah& ganacsadayaal.).*

### 1.8. CIQAABTA BAAL-MARRIDDA DHAQANKA WANAAGSANAN( SANCTIONS FOR NON-COMPLIANCE WITH ETHICAL STANDARDS)

Iyada oo si gaar ah loo saaray saraakiisha Waxgadashada xilka iney yihiin ilaaliyayaasha hantidia dadweynaha darteed, ayaa sharciyo dheeri ah oo gaar ah, ku-dhaqan, waajibaad, iyo amaro lagu xakumo hawlaha dhammaan dadka ka shaqeeya Waxgadashada , iyada oonla eegeyn darajadoodu waxay tahay ayaa la isticmaalyaa.

Raacidda qodobada tilmaamahan ee madaxda Degmada ayaa qasab ah, iyada oo ka tegista tilmaamahan loo tixgalinayo dambi keeni kara ciqaab. Sarkaal kasta oo looga shikiyo in uu na ku dhaqmeynin sharicyada iyo xeerarka , waxa laga fadhiisinayaa shaqada , wixii uu xuquuq lahaana waa la heynayaa ilaa baadhistu dhammaato.

Saraakiisha lagu helo iyaga oo leexsanaya hantida dawladda, iyada oon qiimaha la eegeyn, ayaa markiiba shaqada laga eryayaa.. Dambiyada kale ee baalmarridda sharicyada iyo xeerarka oo ay ka mid dayacaad iyo mas'uliyad darro waxa ka dhalanaya kara ciqaab.

Qandaraasle kasta, ganacsade kasta, ama la –taliye kasta oo isku daya si aan bannaaneyn inuu saameeyn ugu yeesho nidaamka Waxgadashada, ama maamulka qandaraaska wuxuu muteysanyaa ciqaabo. Ciqaabahaas waxa ka mid ah ka mamnuucidda shirkaddaas qandaraasyada dawladda muddo shan sano ah, iyada oo intaas ay u dheer tahay wixii magdhow ah ee maxkamaddu ay ka dalabto..

### 1.9. KORMEERKA GUDAHA IYO KA MADAXA BANNAAN

Degmo kastaayi waa iney hubisaaa in la sameeyo kormeer gudaha ah oo dhinaca shaqada Waxgadashada, iyada oo la raacayo mabaad'da iyo qodobada tilmaamaha, si loo hubiyo waxtarka guud ee Waxgadashada. Kormeer joogto ah ayaa waxa sameeynaya hanta-dhowraha guud, Waliba tilmaamahu waxay sheegayaan nidaam rasmi ah oo joogto ah oo warbinnada Waxgadashada lagu siinayo WAG. WAG iyada oo qiimeyneysaa dhinacyada tayada iyo waxtarka Waxgadashada, ayey dhici kartaa iney u baahato faahfaahin dheeraad ah ee Waxgadashada, waxayna soo saareysaa warbixin natiijada marka ay la tashato hanta-dhowraha

Dhammaan warbixinnada ka soo baxa kormeeradaas waxa loo gudbinayaa Xoghayaha Fulinta Degmada, si uu tallaabo habboon uga qaado. Intaas waxa dheer , warbixinno kormeer madax bannaan iyo baadhis dibadeed ayaa loo gudbinayaa deeq-bixiyayaasha ama hay'ad maalgalineed meelaha warbixintu ay khuseyso qandaraasyo iyo/ama mashaariic ay iyagu maalgaliyaan.

## 2. MAS'UULIYADDA WAXGADASHADA

### 2.1. WASAARADDA GUDAHA (WAG)

WAG waxay leedahay mas'uuliyadda guud ee isku-duwidda , tusaaleynta iyo horumarinta nidaamka Waxgadashada ee dawladaa hoose. Mas'uuliyaddas waxa ku jira horumarinta xirfadda iyo tababardda shaqaalaha ku hawlan Waxgadashada si loo hubiyo heerka wanaagsan iyo raacidda tilmaamaha.

WAG, waxa kale oo ay mas'uul ka tahay iney si madax bannaan u eegaan cabashooyinka qandaraaslayaasha , ganacsatada iyo dadweynaha guud ahaan. WAG waxay awood buuxda u leedahay iney amarto in dib u qiimeyn la sameeyo ama dib loogu tartamo qandaraaska Waxgadashada.

### 2.2. XOGHAYAHA FULINTA

Xoghayaha Fulinta Degmada waa sarkaalka fulinta ee Degmada. Mas'uuliyadda guud ee hawlaha Degmada oo ay ku jirto adeeg-bixintu waxaa iska leh Gudoomiyaha Degmada. Xoghayaha Fulinta waa madaxa dhammaan shaqaalaha Degmada oo leh mas'uulyadda guud ee Waxgadashada, iyo hubinta in raacayo tilmaamaha.

Xoghayaha Fulinta mas'uuliyaddiisa dhinaca Waxgadashada waxa ka mid:

a) Xayeysiinta fursadaha qandaraasyada;
b) Magacaabista Guddiga & xubnaha Qandaraaska Degmada.
c) Magacaabista Guddiga Qiimeynta Qandaraaska .
d) Faafinta go'aamada bixinta Qandaraaska.
e) Saxeexidda Qandaraasyada wuxuu la saxeexayaa Maayarka Degmada Waxgadashada.
f) Baadhista cabashooyinka adeeg-bixiyayaasha, , Qandaraaslayaasha ama la-taliyayaasha
g) Hadii uu waxba ka qaban kari waayo Xoghayuhu cabashada waxa uu u gudbinayaa Gudoomiyaha degmada iyo golaha deegaanka.
h) Hadii ay waxba ka qaban kari waayaan cabashadaas goluhu waxay u gudbinayaan Gudoomiyaha gobolka
i) Hadii uu gudoomiyaha gobolku cabashadaa uu waxba ka qaban kari waayo waxa loogudbinayaa wasaarada arimaha gudaha oo lehna go,aanka kama danbaysta ah
j) Hubinta in qaabka Qandaraaska loo bixiyey uu waafaqsan yahay xeerka & shuruudaha qandaraas bixinta.
k) Warbixin bile ah ayuu u gudbinayaa Gudoomiha Degmada iyo Golaha

## 2.3. GUDDIGA QANDARAASYADA

Degmo walba waxa jiraya guddiga qandaraasyada Waxgadashada qalabka, adeegyada iyo shaqooyinka. Guddiga qandaraasyada degmadu wuxuu ka kooban yahay:

a) Guddoomiye, oo ah mid ka mid ah madaxda waaxyaha ama mid la heer ah ah , waxana magaacbaya Xoghayaha Fulinta ;

b) Xoghayaha ayaa noqonaya sarkaalka Waxgadashada (madaxa unugga Waxgadashada), oo uu soo magacaabay Xoghayaha Fulintu ;

c) 3 xubnood oo ah madaxda waaxyaha ama dhigooda oo uu soo magacaabay Xoghayaha Fulintu ;

Guddomiyaha & saddexda kale waxay xilka heynayaan muddo 3 sanno ah , iyagoo mar kale la magacaabi karo. Xubnaha waxa lagu magacaabayaa aqoonta farsamo iyo xirfadeed ee loogu baahan yahay inay ku gutaan shaqada guddiga. Xubnaha guddiga qandaraasyada waa ineyna ku jirin siyaasiyiin.

### 2.3.1. Maxay muhiim Waxgadashadu ugu tahay mudanayaasha golaha?

Kharashka golaha Degmadu wuxuu wax badan ku baxaa hawsha Waxgadashada shaqooyinka , qalabka & adeegyada uu u soo iibsado golaha degmadu si ay u daboolaan baahida bulshada.

Mudanayaashu waxay u baahan yihiin inay hubiyaan in nidaam Waxgadasho iyo siyaasad waxqabasho ay diyaar u tahay si loo gaadho ujeedooyionka golaha, Tusaale. Iney ballaadhiyaan liiska ganacsatada oo ay soo galiyaan kuwa yar-yar iyo kuwo dhexe, iyo door bidaan nidaamka shaqaale badan uu shaqada qabanayo. Waxaa kale oo ay u baahan yihiin iney hubiyaan in bulshada iyo NGO-da oo ay la socdaan qandaraaslayaal gaar ah ay u tartamaan qandaraasyada golaha, iyo iney hubiyaan fursado loo siman yahay iyo, sharciyo waara in lagu dhaqmo.

### 2.3.2. Waa maxay doorka mudanayaasha ee Waxgadashada?

Waxgadashada iyo maareynta qandaraasku waa iney noqotaa mudnaanta gole kasta oo Degmo. Ka faa'ideysiga fursadaha lagu wanaajinaya adeegyada dadweynaha iyada oo loo keenayo adeegyo cusub iyo hubinta in goluhu leeyahay awoodda iyo kartida uu si guul leh ku keeni karo isbedel, ayaa ah shaqada hoggaaminta ee mudanayaasha . Muhimadda istaraatiijiyadeed ee Waxgadashada ee mudanayaasha waa iney ka muuqataa arimahooga Fulinta , abuuridda hormoodka Waxgadashada, oo laga fahmi karo labo meelood oo kala ah:

i) Hubinta in istaraatiijiyada & nidaamka Waxgadashada ee golahu ansixiyo uu yahay mid sax ah , muuqda oo is-bixinaya, iyo

ii) Hubinta in waxtarka nidaamka waxgadashada uu yahay mid keenaya dantii laga lahaa ee dhinacyada dhaqanka & dhaqaalaha marka kormeer joogta ah & qiimeyn lagu sammeeyo.

Hoos waxa ku yaal su’aalo mudanyaashu ay wax kaga ogaan karaan nidaamka Waxgadashada ee golaha , oo sarkaalka Waxgadashada ay tahay in uu ka jawaabo:

- Waa maxay waxa kharashka aan bixineynaa golo-ahaan?
- Waa maxay waxa aan ku bixineyno?
- Ma innoo cad yihiin shaqooyinka iyo adeegyada mudiimka u ah golaha?
- Wax qiimo leh & ujeedadeenii ma ku helney lacagta?
- Imisa ayey innagu kaceysaa inaan dalbanno shaqooyin, qalab & adeegyo?
- Ma leenahay hab istaraatijiyadeed?
- Ma waxbaan ka qaban karnaa xaaladda sidan ah markaan dib u eegista sammeyneyno?
- Ma ka faa’ideysaneynaa fursadaha habboon?
- Habkeenu ma yahay mid macquul ah?
- Sideen u joojinnaa khiyaamada iyo musuqa?
- Ma raacnaa sharciga Waxgadashada ee dawladda dhexe?
- Ma leenahay koox khubaro ah?
- Ma leenahay xirfadihii loo baahnaa?
- Sideen u hubinaa in nidaam fiicani uu ka jiro golaha dhexdiisa?
- Ma u gaadhsiin karnaa mashaariicda si guul ah?

• Sideen u maareynaa qandaraasyada?

• Ma fiican yahay xidhiidhka aan la leenahay ganacsatada /qandaraaslayaasha?

Xoghayaha Fulinta ayaa go'aamin kara magacaabista guddoomiye iyo xubno mar kasta iney: baadhaan Ku xad-gudub awood xafiis; Musuq-maasuq; aqoon-darro; tamar ama maskax darro ka dhigta qofka inuu gudan waayo xilkiisa; iyo helid dambi

Guddiga qandaraasku wuxuu casuumi karaaa saraakiisha dawladda ee Degmada in ay kala soo qeyb-galaan shirarka si ay uga caawiyaan Guddiga arrimaha farsamada. Laakiin, kuwaa la casuumay malaha codeyn.

### 2.3.3. Mas'uuliyadaha guud ee Guddiyada Qandaraas

Dhammaan Guddiyada Qandaraasyadu waxay leeyihiin mas'uuliyad:

a) Hubinta in dhammaan tilmaamaha Waxgadashada ee WAG ay si fiican u raacaan shaqaalaha Waxgadashada.
b) Isku dubaridka diyaarinta iyo ansixinta qorshaha Waxgadashada ee sanadka.
c) Ansixinta wixii lagu biirinayo ama laga saarayo diiwaanka adeeg-bixiyayaasha & la-taliyayaasha.
d) Soo jeedinta magacaabista guddi-ku-meel-gaadh ah oo diyaarisa tafaasiisha (specifications), Furidda qanadaraasyada, qiimeynta qanadaraasyada , la wareegidda qalabka iyo caddeymaha shaqooyinka.
e) Dib-u-eegis iyo ansixin ka hor intaan la shaacin nidaamka Waxgadashada:
    - ✓ Qaabka Waxgadashada
    - ✓ Dukumentiga qiimayaasha & qandaraaska
    - ✓ Tafaasiisha, kala tilmaamidda(classifications), Qoraalka tirooyinka(bills of quantities), naqshadaha, sawirrada iyo waajibaadka(TOR)
    - ✓ Xayeysiinta, Warqadaha casuumadda(letters of invitation) iyo liiska gaaban (shortlists)
f) Dib-u-eegista warbixinnada qiimeynta & ansixinta qandaraaska la bixiyey.
g) Keydinta murtida shirarka iyo qoraalada go'aamada iyo soo jeedimaha.

### 2.3.4 Ansixinnada Guddiga qandaraasyada

Dhammaan wixii qandaraas la ansixinayo waa iney ku jiraan qorshaha Waxgadashada ee sannadka Guddiguna waa iney hubisaa in miisaaniyad ku filan loo hayo. Degmadu ma xayeysiin karto, ma casuumi karto, kuma baaqi karto qandaraasyo ilaa ay ansixiyo Guddiga qandaraasyadu. Sidoo kale , Degmadu ma bixin karto qandaraas ilaa uu ansixiyo Guddiga qandaraasyadu.

Guddiga qandaraasyada waxa looga baahan yahay inay ansixiyaan qorshe sanadeed faahfaahsan oo ah Waxgadashada qalabka, shaqooyinka, iyo adeegyada oo qeyb ka ah miisaaniyadda sannadka , iyo iney dib-u-eegaan qorshaha Waxgadashada iyada oo ku saleysan sida ay u kala mudan yihiin. Koobi qorshaha kama dambeysta ah ee Waxgadashada Degmada waa in loo gudbiyaa WAG. Guddiga qandaraasyadu waxay warbixin saddex biloodle oo ah hawlaha waxgadashada degmada u soo gudbineysaa WAG .

## 2.4. UNUGGA WAXGADASHADA

Guddiga qandaraasyada waxa gacan siinaya unugga Waxgadashada oo leh shaqaale xirfad leh, si ay isugu dubbaridaan shaqooyinka farsamo ee Waxgadashada Degmada. Mas'uuliyadda Waxgadashadu waxay hoos timaadaa waaxda maaliyadda. Madaxa waaxda maaliyaddu waa in uu qof shaqaale ah u magacaabaa (Sarkaalka Waxgadashada) si uu u fuliyo hawlaha Waxgadashada. Mas'uuliyadaha Sarkaalka Waxgadashada waxa ka mid ah:

a) Ka codsiga madaxda waaxyaha, mashaariicda iyo barnaamijyada xog faahfaahsan oo loo rabo diyaarinta qorshaha Waxgadashada sannadka
b) Qabashada iyo falanqeynta xogta qorshaha Waxgadashada sannadka ee ka timaada unugga Waxgadashada , mashaariicda iyo barnaamijyada
c) Diyaarinta iyo qiimeynta qorshaha Waxgadashada sannadka si uu u ansixyo Guddiga Qandaraasku
d) Dib-u-eegista iyo u kala horumarinta si ay u kala mudan yahay qorshaha Waxgadashada sannadka si uu u ansixyo Guddiga Qandaraasku in la maalgeliyo ;
e) Ogeysiinta miisaaniyadda Waxgadashada ee loo ansixiyeymadaxda waaxyaha , unugyada, mashaariicda
f) Fulinta dhammaan hawlaha Waxgadashada oo ay ka mid tahay qiimeynta iyo bixinta qandaraas;
g) Ka jawaabidda codsiyada caddeymaha ay dabadaan qandaraaslayaasha.;
h) Ogeysiinta qandaraaslayaasha wixii laga bedelay maalinta qandaraasku xidhmayo.;
i) Codsiga kordhinta mudada qanadaaska ee ka yimaada qanadaaslayaasha, haddi loo baahdo;
j) Diiwaangelinta iyo ilaalinta muunadaha ay keenaan qandaraaslayaasha;
k) Hubinta in dhammaan waajibaadka Degmada ee qandaraasyada loo guto markiiba sida ugu fiican;
l) Diiwaangelinta iyo ilaalinta wixii dammaanad qaadyo ah iyo wixii la reebayo;
m) Ogeysiinta markiiba adeeg-bixiyayaasha wixii ka gaabiyaan waajibaadkooda;
n) Eegidda cabashooyinka ka heysashada
o) La socdka jadwalka wax la keenayo, iyo baadhista iyo caddeynta wax keenis ama waxqabad;

p) Isku-duwidda nidaamka lacagta lagu siinayo ganacsatada;
q) Wargelinta Guddiga Qandaraasyada dhammaan wixii Waxgadashooyin ah ee uu qabtay unugga Waxgadashada ee loo xilsaaray si ay ansixin ugu helaan;
r) Fulinta hawlaha xogheynta iyo la talinta Guddiga Qandaraaska Degmada
s) Keydinta diiwaanka qandaraasyada ;
t) La xidhiidhida iyo la socodsiinta wararka waaxyaha wax la dalbaday, shaqaalaha farsamada, guddiga furidda qandaraasyada, guddiga qiimeynta qandaraasyada markii loo baahdo si aanu waxba mugdi u galin hawlaha Waxgadashada;
u) Haynta diiwaanka adeeg bixiyayaasha & la-taliyayaasha soo baxa.
v) Fulinta wixii hawlo kale ah ee uu xilsaaro Guddiga Qandaraasyadu.

## 2.5. WAAXYAHA ISTICMAALAYA AMA SOO DALBANAYA

Waa waaxda soo gudbisata codsiga Waxgadashada iyadoo leh waajibaadkan:

a) In ay hubiso baahideeda waxgadashadu inay tahay:

- ✓ Mid garawshiiyo leh oo waaxdu u baahan tahay
- ✓ Mid qalabka la rabo aan laga heleyn bakhaarada
- ✓ Mid ku jirta qorshaha Waxgadashada sannadka
- ✓ Mid laga bixin karo miisaaniyadda socota ama ta horumarinta.

b) Diyaarinta codsiga Waxgadashada

c) Wax ku biirinta qiimeynta farsamo ee Qandaraasyada

d) Caddeynta lacag siinta Qandaraaslayaasha, adeeg-bixiyayaasha iyo la taliyayaasha.

e) Ogeysiinta unugga waxgadashada wixii iska bedela heshiiska qandaraas bixinta

f) Diyaarinta tafaasiisha farsamo.

g) Diyarinta warbixinnada la hordhigayo unugga Waxgadashada unit ama Guddiga Qandaraasyada ama Xoghayaha Fulinta .

## 2.6. GUDDIGAYADA FURISTA QANDARAASYADA

Guddiga fureysa qandaraaska waxa marka loo baahdo magacaaba Guddiga Qandaraaska Degmada si ay mid walba u furan iyaga oo raacaya xeerka furitaanka

## 2.7. GUDDIGAYADA QIIMEYNTA QANDARAASYADA

Guddiga qiimeynta qandaraasyada waa iney ka koobnaadaan saraakiil aqoon takhasus u leh Waxgadashada la fulinayo. Qiimeynta waxa sameeya Guddiga qiimeynta oo uu magaacaabo Xoghayaha Fulintu isaga oo tixgalina talooyinka Guddiga Qandaraaska.

Mas'uuliyada Guddiga qiimeynta waxa ka mid ah:

a) Hubinta wixii qaladaad ah xisaabeed ah ee qanadaasyada.
b) Falanqeynta qiimaha qandaraaska iyo ka warbixinta natiijada.
c) Diyaarinta warbixinta qiimeynta oo ay ku jiraan talo soo jeedin in la diido ama la qaato qandaraaska si ay u ansixiyaan Guddiga Qandaraasku
d) Hubinta qandaraasyada & muunaduhu iney waafaqsan yihiin tilmaamahii & shuruudihii lagu cayimay dukumentiga qanadaraaska .
e) Ka warbixinta qandaraas kasta sida uu u waafaqsan yahay dhinac farsamo & dhinac ganacsi marka qiimeeynta farsamo la sameynayo.

Xubnaha Guddiga qiimeynta waxaa looga yeedhan Degmada meel ka baxsan, haddii loo baahdo xirfado ama waaya-aragnimo aan laga heleyn degmada. Waxa kale oo loo yeedhan karaa marka xubnaha degmada ay dano iska soo horjeeda ay leeyihiin. .

## 2.8. GUDDIGAYADA FATISHAADA/LA WAREEGIDDA(INSPECTION)

Guddoonka dhammaan qalabyada, iyo ansixinta shaqo & adeegyo la dhammeyey waa iney soo maraan fatishaad iyo caddeyn Guddi rasmi ah. Taas waxa ku jira fatishaada bilowga & dhammaadka fatishaadda wareegidda shaqada & fatishaada & guddiga la-wareegidda ee shaqooyinka. Xubnaha guddiya fatishaada waa ineyna noqonin xubnaha Guddiga Qandaraaska ee iyagu ansixiyey ama kormeerey nidaamka Waxgadashada. Guddiga fatishaada/la wareegidda waa iney ka koobnaadaan saraakiil leh aqoon takhasus ee dhinaca Waxgadashada.

# 3. QAABABKA WAXGADASHADA

## 3.1. QAABABKA WAXGADASHADA

Qaababka Waxgadashada ee la iticmaali karaayi waa kuwa soo socda :

a) Qandaraas Tartan Furan (National iyo International)

b) Qandaraas Xadidan (National iyo International)

c) Qiimo weydiin (Request for quotations)

d) Meel kaliya

Waxgadashada qalabyada, shaqooyinka iyo adeegyada ee loo maro qaabka tartanka ah ee caalamka iyo wadanka gudihiisa, ayey tahay in marka ugu horeysaba laga qaatao, inta aan hababka kale la isticmaalin. Noocyada kale ee waxgadashada waxa kaliya ee la isticmaali karaa marka la hubo in loo qaban karo iyada oo la ilaalinayo dah-sooneynta, dhaqaalaha, tayada fulinta mashruuca. Laakiin, ogolaansho qoraal ah marka hore waa in laga helaa Guddiga qandaraaska. Inta waxa dheer, Degmadu waa in ay raacisaa qoraal caddeynaya sababaha & duruufaha loo qaatay hababka kale ee aheyn qandaraas tartan ah oo dibedda & gudaha ah.

## 3.2. QANADAAS TARTAN FURAN

Qandaraas tartan furan oo dadweynaha loo xayeysiinayo ayaa ah habka la doorbido ee Waxgadashada dawladda. Qanadaas tartan oo wadanka gudihiisa ah marka la sammeynayo, Degmadu waxay casuumeysaa ganacsatada, adeeg-bixiyayaasha ama qanadaraaslayaasha iyada oon loo eegeyn dhalashadooda in ay keenaan qiime qanadaraas lagu doonayo qalabyo, adeegyo iyo shaqooyin taas oo lagu xayeysiinayo wadanka gudihiisa kaliya. Qandaraas tartan oo gudaha ah waxa la isticmaala:

a) Marka Lacagta dhammaan Somalilland Shilling lagu bixinayo.

b) Marka wadanka gudihiisa qiimayaasha alaabada, adeegyada, iyo shaqooyinku ay ka jaban yihiin kuwa dibadda.

c) Marka qiyaasta kharashka ee alaabada, shaqooyinka ama adeegyada uu yar yahay ama uuna ka badneyn heerkii uu ka bilaabmayey qandaraas furan ee caalami ah.

d) Marka Shaqooyinku ama adeegyadu ay ku kala baahsan yihiin deegaamo ama waqti dheer.

e) Shaqooyinku waa kuwa shaqaale badan u baahan

f) Waxtarka tartan caalami ah waxa ka weyn culeyska maamulka ama maaliyadeed ee hawshaas.

Xagga nidaamka wax u dhaxeeya ma jiraan tartanka Qanadaas caalami iyo tartanka Qanadaas wadanka gudihiisa ah, oon ka aheyn in ka caalamiga lagu xayeysiiyo saxaafadda dibadda iyo in waqti dheeri ah loo ogolaado inta uuna xidhmin qanadaaska . Tartan caalami ah wuxuu ku habboon yahay marka Waxgadashada alaab qaali ah ama farsamo culus leh (complex ) loo baahan yahay ama marka dabeecadda shaqadu ama xajmigeedu ayna u badneyn in uu soo jiito qandaraaslayaal wadani ah

### 3.3. QANADARAAS XADIDAN

Qanadaraas xadidan waa qaab si toos ah loogu casuumo liis kooban oo ganacsato horey u soo baxday horey loo diiwaan-geliyey, ama la yaqaan. Tani waxay ka dambeeysaa ganacsato horey ugu soo baxday dalab gaar ah . Qaabkani waxa uu ku habboon yahay:

a) Marka qiimaha qandaraasku uu ku xaddidan yahay heer qandaraas kooban
b) Dalabku waa mid dabeecad gaar ah leh ama khuseeya nabadgelyada oo ayna suuroobeyn in la faafiyo.
c) Dalabku waa mid deg-deg loogu baahan yahay.
d) Marka horeba waxa kooban tirada ganacsatada la fili karo.
e) Waxa shaqeyn waayey nidaamka tartan furan oo keeni waayey in la bixiyo qandaraaska.

Qaabkan, Degmadu waxay casuumeysaa qanadaaslayaal liis ballaadhan oo ah ganacsato hore u soo baxay, si loo hubiyo qiimayaal tartama, iyo in loo yeedho dhammaan ganacsatadaas marka tiradoodu lix yihiin ama ka yar yihiin. Nidaamka tartan Qanadaraas ayaa la isticmaalaya mar walba, oon ka aheyn xayeysiinta lagu bedelo liis kooban oo loo yeedhayo. Qanadaraas xadidan waxa ku jira codsiyo adeegyo, marka loo baahdo adeegyada la taliye. Marka la isticmaalo Qanadaraas xadidan waa in lagu caddeeyo sababta buugga waxgadashada .

### 3.4. CODSI QIIMAYAAL

Qaabkan waxa loo yaqaan“Tukaameysi” waxayna ku saleysan tahay isbarbardhigidda qiimayaal laga helo dhowr ganacsato, badanaa waa saddex ganacsade ugu yaraan, si loo hubiyo qiimayaal tartamaya. Qaabkani waxa uu ku habboon yahay marka la gadanayo alaab iska diyaar ah ama qiimaha alaabadu uu yar yahay. Guddiga qandaraaska Degmada ayaa ansixiya tartanka codsi qiimayaal, marka la ogaaday in:

a) Alaabada si fudud looga helayo suuqa , qiimahooguna jaban yahay , sifahooguna yahay mid iska caan ah.
b) Noocyada alaabadu ay aad u kala duwan tahay taas oo ayna dani ugu jirin qanadaraasle

Qiimayaasha waa in laga helaa ugu yaraan saddex ganacsade. Liiska ganacsatada lala xidhiidhaya waa in la hordhigaa Guddiga qandaraasyada si ay u ansixiyaan , isla mar kaliya ganacsatada la ansixiey waxa loo diraa warqado casuumado ah oo qiimayaal lagu weydiinayo . Warqaddaha casuumaduhu waa iney ku qornaadaan :

a) Magac dhameystiran & cinwaanka cidda wax laga dalbanayo;
b) Faahfaahin dhameystiran oo ah qalabyada, shaqooyinka or adeegyada la dalbanayo oo ay ku jiraan tilmaamaha farsamo, sawirrada iyo tayada loo baahan yahay.
c) Tirada qalabyada la keenayo iyo waqtiga iyo meesha la keenayo;
d) Haddi shaqooyin ay tahay, biilka tirooyinka, meesha iyo waqtiga loo baahan yahay in lagu dhammeeyo;
e) Haddii adeegyo ay tahay , liisaska bartilmaameedyada uu hiigsanayo adeeg-bixiyuhu, liiska shaqooyinka & xilalka gaarka ah ee la qabanayo, jadwalka wax keenista ama natiijooyinka lagu qiyaasayo himilooyinka , mudada adeegyada iyo qaabka loo qiyaasayo waxqabadka adeegyada la keenay;
f) Haddii la ogol yahay sifaad ka duwan qalabyada, shaqooyinka, adeegyada la dalbaday;
g) Xogta ku saabsan kharshyada aan aheyn kuwa qalabyada or adeegyada , sida kharashyada soo qaadista, caymiska, cashuuraha ee ay tahay in lagu soo daro qiimaha;
h) Shuruudaha lagu qiimeynayo qiimayaasha ama qanadaasyada oo ay ka mid yihiin waxyaabo farsamo ;
i) Mudadu caadiyan waa shan iyo afartan cisho, oo qiimayaashaasi ay ansax ahaanayaan;
j) Foomka qandaraaska ama dalabka iibsiga gudaha, oo ay ku qoran yihiin shuruudaha lacag bixintu;
k) Qoraal ku saabsan nooca lacagta la siinayo haddii ay ka duwan tahay tan uu qiimaha ku soo qortey;
l) Qoraal sheegaya in ciddan waxgadaneysa ay qasab ku aheyn iney aqbalaan qiime, laakiinse ay diidi karaan dhammaan qiimayaasha;
m) Sida qiimayaasha loo keenayo ; iyo
n) Goobta, taariikhda la keenayo iyo midda la furayo.

### 3.5. MEEL KALIYA

Waxgadashada meel kaliya ah oo laga dalbado gaancade aan lala tartameyn (Waxgadashada tooska ah) waxay ku habboon tahay marka laga helo WAG ogolaansho xaalad gaar ah, marka:

a) qandaraasle kaliyihi uu keeni karo alaaabada, ama qaban karo adeegga.

b) qandaasle hore, laga dalbanayo qalab dayactir ah oo loogu baahan yahay qalabkii uu horey u keeney, ama shaqo horey uu u qabtay ama kordhin qalabkii hore ama adeeggii hore.
c) Shaqo dheeri ah oon markii hore lagu darin duruufo aan la sii saadaalin karin awgeed.
d) Ay jirta xaalad deg-deg ah oon aheyn tu ku timid xilkasnimo la'aan dhinaca degmada ama fiirsasho la'aan.
e) Adeeg u baahan yahay la taliye aqoon gaar ah leh.

### 3.6. SHAQAALE TOOS AH(FORCE ACCOUNT)

Shaqaale toos ah waa fikir jeedo isticmaalka hay'adaha dawladda , waaxyaha ay khuseyso, kuwaas oo leh shaqaalahooga & qalabkooda . Isticmaalka shaqaalaha tooska ah waxa garaawshiiyo leeyahay marka :

a) Shaqooyinka loo baahan yahay ay yar yihiin kuna kala baahsan yihiin oo meelo fog , taas oon ka shirkadaha aqoonta u saamaxeyn ku qnadaraasaan qiime macquul ah ;
b) Shaqada ayaa loo baahan yahay in la fulinayo iyada oon la hakiney hawlaha socda;
c) Khasaaraha hakinta aan laga maarmeyn ku yimaad , ayey ku fiican tahay qaado hay;adda waxgadaneysaayi ama hay'ad dawladeed halkii uu qaadi lahaa qandaasle;
d) Waxa jira waxyaaba deg-deg ah oo u baahan tallaabo dhaqso ah.

### 3.7. WAXGADASHADA WADAAGA AH EE DAWLADDA & GANACSATADA GAARKA AH ( Public Private Partnership (PPP)

Wadaagga Dawladda & ganacsatada gaarka ah waxa ka mid ah noocyadan soo socda ama isku darkooda; qandaraas adeeg, qandaraas maareyn , ijaar, wada lahaansho, wadaag, dhis oo ka shaqeysii oo wareeji, Dhis yeelo ku shaqee, Hindis dhis ku shaqee maalgeli oo yeelo mudnaan gaar ah. Adeegyada aan laheyn xuduudo shaqo, sharci ama dawladeed ee qasbaya jn shaqaalaha dawladdu qabato , ayey dhici kartaa in loo wareejo nidaam ay ka qeyb-galayaan ganacsato gaar ah. Isla marka ay Degmadu aragto mashruuc ay tahay inay wadaag u qabataan dawladda & ganacstadu, waa in degmadu :

a) Hubisaa iney degmadu leedahay khibraddii ay ku wadi laheyd wadaagga dawlada &ganacsatada.
b) Waa iney ka magacawdaa degmada gudaheega ama dibadeeda sarkaalkii mashruucaas,iyo
c) Waa iney magacawdaa la taliye heshiis.

Mashruuca wadaaga dawladda & ganacsatada ah, degmadu waxay sammeynayaa daraasad si ay:

a) U xaqiijiso in degmadu ay awooddo mashruucaas, haddii ay balanqaad lacageed sameyso;
b) U ogaato waxyaabaha qiimaha lacageed ku xidhan yahay,
c) Qiimeyso faaiidada uu keenayo mustaqbalka wadaagga dawladda & ganacsatada;

d) Timaamto noocyada wadaagga dawladda & ganacsatada ee faaiido keenaya;
e) Garato heerka ugu fiican ee wadaagga dawladda & ganacsatada ;
f) Timaamto waaxyaabaha lagu qiimeyn karo faa'iidada heerka Waxgadashada ;
g) U sameyso saldhig macquul ah Degmada si ay u go'aamiso nooca Waxgadashada;
h) Diyaariso maaliyadda loo qoondeeyey iyo khataraha farsamo ee ka dhex dhici kara Degmada iyo ganacstada gaarka ah; iyo
i) Macneyso awoodda waxgadashada hay'adda waxgadaneysa si ay u gataan, fuliyaan, maareeyaan, hirgaliyaan u kormeeraan mashruuca wadaaga dawladda & ganacsatada. .

Daraasadda laga sameeyo ka qeyb-galka ganacsatada gaarka ah adeegyada bulshada, ayaa talo ka bixin karta dhinacyada adeegyada Degmada gudaheega ee la siin karo ganacsatada gaarka ah iyada oo:

a) Faahfaahineysa hay'adda waxgadaneysa, dhinacyada adeegga iyo kharashyada la socda;
b) Soo bandhigaysa falanqeyn ku saabsan sida ay ugu habboon tahay in qandaraas lagu bixiyo adeegyada imika la qabto oo la siiyo ganacsato gaar ah;
c) Tilmaameysa arrimaha muhiimka ah ee ay tahay in wax laga qabto intaan adeegyada qandaraas lagu bixin, kuwaas oo ay ka mid yihiin, balse ayna ku koobneyn:
    - ✓ Adeegu waxa uu ka kooban yahay;
    - ✓ Mudada qandaraaska iyo siyaabaha qiimayaasha;
    - ✓ Waxa laga yeelayo hantida dawladda;
    - ✓ qandaraaska siyaabaha loo dooranayo;
    - ✓ Arrimaha shaqaalaha;
d) Caddeyneysaa dhinacyada muhiimka ah ee in wax laga qabto ay tahay ee dhinaca siyaasadda ka qeyb-galinta ganacatda gaar ah; iyo
e) Soo bandhigidda qorshe lagu maareynayo wixii khataro ah.

Degmadu ku dhaqaaqimeyso wajiga Waxgadashada wadaagga dawladda & ganacsatada, haddii daraasaddu tilmaanto ineyna wax faa'iido ah u laheyn ama tayada adeegga dadweynaha ayna wanaajineyn

Degmadu waxay ku xayeysiineysaa codsiga soo dalbashada foomka ogeysiiska Waxgadashada gaarka ah , oo lagu soo qorayo ugu yaraan hal joornaal oo aad loo iibsado wadanka Puntland gudihiisa, iyo joornaal caalami ah oo ay tilaamaan Guddiga qandaraasku, iyada oo sidoo kale lagu xayeysiin karo joornaalada u gaarka ah ganacsiga & farsamooyinka.

Ogeysiiska soo dalbashada waxa la sameynayaa isla marka xayeysiiska lagu sameyo joornalada wadanka, waxana la siinayaa waqti ku filan oo u suurta-gelisa qanadaaslayaasha iney helaan dukumentiga codsiga dalabka , ku diyaariyaan oo ay ku keenaan jawaabaha. Ogeysiiska codsiga dalabku waxa ku qornaanaya waxyaabahan soo socda:

a) Faahfaahin kooban oo ah ujeedada ay dawladdu u fulineyso mashruucan ;
b) Faahfaahin ballaadhan oo mashruuca ah;
c) Tilmaamidda meelaha gaarka ah ee dhinacyadu ka heli karaan koobiyada codiga dalabka, taariikhaha iyo waqtiyada la heli karo, qiimaha koobiga lagu heli karo;
d) Caddeynta taariikhda, waqtiga iyo goobta la keenayo
e) Qoraal meesha iyo sida loo qiimeynayo codsiyadaas iyo waqtiga lagu ogeysiin doono kuwa keeney natiijada qiimeynta .

### 3.8. KA QEYB-QAADASHA BULSHADA EE WAXGADASHADA

Meesha dantu tahay in mashruucu noqdo mid is wada ama in la gaadho ujeedooyin gaar ah, waxa markaa loo baahan yahay in:

a) Lagu baaqo ka qeyb-galidda bulshada; ama
b) In la kordhiyo isticmaalka aqoonta deegaanka ama qalabka; ama,
c) La isticmaalo shaqaale badan iyo farsamo ku habboon. Habka Waxgadashada, tilfaasiisha iyo qandaraasku waxa uu ka kooban yahay waxa la qaadanayaa mid ku habboon oo ka turjumaya xaaladahaas.

Bulshada ka faa’iideysaneysa ayaa mas’uul ka ah hawlaha Waxgadashada ee mashruucaas. Maamulka mashruucu wuxuu yeelanayaa mas’uuliyad ah inuu siiyo tababarrada loo baahan yahay iyo dukumenti fudud oo la heer la yaqaan ah si uu u awoodsiiyo bulshada iney u fuliso shaqada Waxgadashada si ay aqbali karto WAG. Waxa intaas dheer, Degmadu waxay raacineysaa dukumentiga qanadaaska , siyaabihii loo kormeeri lahaa , waxayaabaha layska rabo iyo ciqaabtii haddii la raaci waayo.

### 3.9. XULASHADA IYO KU SHAQEYSIGA LA-TALIYAYAASHA

Waxgadashada adeegyada la-taliyuhu waa nooc Waxgadasho oo khaas ah oo u baahan hab qanadaraas iyo dukumenti ka duwan kuwa caadiga ah ee qalabyada iyo shaqooyinka. Isticmaalka nidaamka qiimeynta fiicnida iyo nidaamka qanadaraas ee labada gal la isticmaalo ayaa ah waxyaabaha joogtada ah ee loo isticmaalo waxgadashada iyo doorashada la-taliyayaasha. Nidaamka qiimeynta fiicnaanta tartanka farsamada iyo mid lacagta ah ayaa lagu keenaa labo gal oo kala duwan oo xidhan .

Galalka lacagta waxa la furi karaa kadib marka la furo kuwa xagga farsamada ah ee qiimeyntooda la dhammeeyo ee ay ansixiso Guddiga qandaraasyadu , waxana ka qeyb-gala qanadaaslayaasha hela inta ugu yar qiimeynta la ogol yahay . Iyada oo la eegayo dah-soonaan la'aanta, ayaa la sameeyaa furitaanka labaad oo ah galka lacagta ee qanadaaslayaashii gudbay qiimeyntii farsamada. Culeysyada qiimeynta ee la saarayo farsamada & lacagta ,waxa lagu cadeeynayaa dukumentiga codsiga soo-jeedimaha(Request For Proposal). Taasi sida badan, waxaa loo dhigaa 80% dhinaca farsamada , 20% dhinaca lacagta.

### 3.9.1. Xulashada ku saleysan tayada iyo qiimaha

Xulashadaa ku saleysan tayada & qiimaha waa habka caadiga ah ee loo doorto la-taliyayaasha iyada oo tartan laga dhaxeysiinayo shirkada liiska gaaban ku soo baxay. Xulashadu waxay ku fsaleysan tahay tayada xagga farsamada la-taliyaha , tayada qoraalkooda iyo qiimaha adeegyada ay bixinayaan. Culeysyada qiimeynta ee la kala saaraayo dhinaca tayada farsamada iyo qiimaha qoraalkooda waxa loo go'aamiyaa xaalad walba goonideed iyada oo ku xidhan dabeecadda hawsha.

### 3.9.2. Xulashada ku saleysan tayada

Xulashada ku saleysan tayada waxaay ku habboon tahay hawlaha farsamada culus leh ama takhasus gaara leh ,ama kuwa keenaya wax cusub(casri). Xulashadu waxay ku saleysan tahay kaliya tayada qoraalka iyada oon la tixgalineyn qiimaha. Xulashada ku saleysan tayada waxay ku habboon tahay :

a) Hawlaha Farsamo sare leh ama takhasus gaar ah , meelaha ay adag tahay in si sax ah loo tilmaamo shaqada la-taliyayaasha iyo waxa laga doonayo, iyada oo laga filayo la-taliyaha inuu tuso wax cusub;
b) Hawlaha Saameyn waqti dheer leh iyada oo ujeedadu tahay in la helo khubarada ugu fiican(Tusaale ahaan, Daraasadda & naqshadda injineeriyadda dhismaha ee sida biyi xidheen, daraasad siyaasadeed of dan qaran leh, Daraasado sida loo maareynayo hay'ado waaweyn oo dawladeed); iyo;
c) Hawlaha Siyaabo kala duwan loo fulin karo, sidaa darteed aan la is-barbar dhigi kareynin qoraalada (Tusaale, talo ku saabsan maareynta ama daraasad siyaasadeed oo tayahda shaqadu ku xidhan tahay tayada falanqeynta)

Dukumentiga lagu codsanyo soo jeedimaha (request for proposals) ma sheegayo wax miisaaniyad ah, laakiin wuxuu tilaamayaa tirada shaqaalaha muhiimka ah iyo waqtiga, isaga oo caddeynaya in tirooyinkaasi yihiin kuwa qiyaas uun loo siiyey kaliya, iyada oo a-taliyayaashuna u madax bannan yihiin iney soo jeeedintooda keenaan. Dukumentiga lagu codsanyo soo-jeedimaha waxa lagu dalban karaa

keenista soo jeedin farsamo kaliya (iyada oo ayna la socon tii lacagtu), ama waa la dalban karaa keenista labadaba farsamada & lacagtaba mar kaliya, laakiin lagu keenayo galal kala duwan (labo gal qaab ah). Galka lacagta ee uu keeno kan xagga farsamada ugu fiicnaada ayaa la furayaa kaliya. Kuwa kale iyaga oon la furin ayaa loo celinayaa qanadaaslayaashii, kadib markii wada hadallada si guul leh loo dhammeeyo .

Haddii la dalbado soo jeedimo farsamo kaliya, marka la qiimeeyo la-taliyaha ugu sareeya qiimeynta ayaa lagu casuumayaa inuu keeno qiimihiisa oo faahfaahsan. Degmada iyo la-taliyaha ayaa ka wada hadli doona lacagta iyo qandaraaska.

### 3.9.3. Xulasho ku saleysan qiime go'an (Fixed Budget Selection (FBS))

Xulashada ku saleysan qiime go'an waxa la isticmaala marka degmadu raadineysa iney hesho soo-jeedinta farsamo ee ugu fiican, oo ay ka dhex xulato liis la-taliyaal oo horey u soo baxay oo ay ku hesho qiime horey loo go'aamiyey, . Habkan wuxuu ku habboon yahay kaliya marka hawshu tahay mid fudud oo si sax ah loo cayimi karo oo qiimuhuna yahay mid xadidan.

Dukumentiga codsiga soo-jeedimaha ayaa tilmaamaya lacagta la hayo iyada oo laga codsanayo la-taliyayaasha iney ku keenaan soo jeedintooda farsamada & lacagta labo gal oo kala gooni ah oo xidhan. Hawlaha la qabanayo waa in loo diyaariyaa si taxadir leh, si loo hubiyo in lacagtu ku filan tahay shaqada laga filayo la-taliyayaashu iney qabtaan.

La-taliyayaasha ku gudba qiimeynta farsamo kaliya ayaa la furayaa soo-jeedintooda lacageed. Kuwa kale waa loo celinayaa galalkoodii oon la furin. Wixii ka badan lacagta la sii xadiday waa la iska diidayaa. La-taliyaha ugu sareeya qiimeynta farsamo ee xadiga lacagta la sii cayimay aan dhaafin ayaa la siinayaa qandaraaska.

### 3.9.4. Xulashada ku saleysan qiimaha ugu yar

Habkani wuxuu ku habboon yahay xulashada la-taliyayaasha hawlo joogto ah oo la yaqaan loo dirayo (hanta-dhowr, sammeynta naqshadaha fudud, iwm) , meelahaas oo ay ka jiraan nidaamyo & xirfado soo jireen ah, iyo marka qiimaha qandaraasku yar yahay.

Qiimeynta (score) ugu yar ee lagu guuleysanyo ayaa lagu sheegayaa dukumentiga codsiga soo-jeedimaha. Liiska koobab ee qanadaaslayaasha ayaa laga rabaa iney ku keenaan soo-jeedimahooga

farsamada &lacagta labo gal oo kal duwan . Galalka soo-jeedimaha farsamo ayaa la furayaa marka hore oo la qiimeynayaa. Qanadaaslayaasha ka hoos mara qiyaasta ugu yar ee lagu guuleysanyo waa la diidayaa. Soo-jeedimaha lacageed ee inta soo hadha ayaa la furayaa, ka ugu qiime jaban ayaa la siinayaa qandaraaska .

### 3.9.5. Xulashada ku saleysan aqoonta la-taliyayaasha

Habkani wuxuu ku habboon yahay hawlaha yar yar meelaha aan looga baahneyn keenista soo-jeedimo faahfaahsan. Caddeynta inuu daneynayo iyo xogta la-taliyaha , waaya-aragnimada uu hawshaas u leeyahay ayaa la weydiinayaa. Shirkadda aqoonta ugu habboon leh iyo meelo la weydiiyo ayaa la xulanayaa. Shirkadda la xushay ayaa la weydiistaa iney keento soo-jeedinteeda farsamo & tan lacagteed oo isku jira, kaddibna waxa loogu yeedhaa in laga wada hadlaa soo-jeedinta iyo qandaraaska.

### 3.9.6. Xulashada ku saleysan meel kaliya

Xulashada meel kaliya oo la-taliyaal ah waxa ka maqan faa'iidadii tartanka ee dhinaca tayada iyo qiimaha , waana xulasho dahsaaon, waxayna dhiiri-galin kartaa dhaqamo aan la aqbali Karin. Hadaba habkaas waa in la isticmaala duruufaha gaarka ah kaliya. Sababta habka loo isticmaalayo waa in si foojigan loo eegaa, si loo hubiyo lacagta iyo tayada. Xulashada meel kaliya ahi, waxay haboon tahay marka uu jiro waxtar muuqda oo ay dheer tahay hababka tartanka sida :

- Hawlaha horey u socday oo halkii laga sii wadayo;
- Meelaha xulasho deg-deh ah loo baahan yahay (sida xaalada deg-degga ah);
- Hawlaha qiimo yar ku kacaya;
- Marka ay shirkad kaliya ay hawshaas aqoon u leedahay.

## 3.10. NOOCYADA HESHIISKA QANDARAASYADA EE SHAQADA LA-TALIYAYAASHA

Nooca qandaraaska waa in la xushaa marka la diyaarinayo codsiga keenista soo-jeedimaha, iyada oo daraaf ahna loogu soo daraa dhammaan shuruudaha qandaraaska dukumentiga codsiga soo-jeedimaha.

### 3.10.1. Qandaraasyada Xaddi lacag ah (qiime go'an ) lump sum

Qandaraasyada qiimaha go'an waxa badiyaa loo isticmaala hawlaha si cad loo qeexi karo waxa ay hawshu ka kooban tahay iyo mudada adeegyada; iyo natiijada laga sugayo. Qandaraasyada qiimaha go'an

ayaa aad loogu isticmaalaa hawlaha qorsheynta fudud & daraasadaha, daraasadaha deegaanka, naqshado faahfaahsan oo qaabab caadi ah ,diyaarinta nidaamka xogta shaandheeya, IWM.

Lacag bixintu waxa lagu xidhaa wax-soo-saar qeexan , sida warbixinnada, Naqshadaha , biilasha tirooyinka, dukumentiga qanadaasyada, iyo barnaamij kombiyuutar. Qandaraasyada qiimaha go'an wey sahlan tahay sida loo maamulo, waayo lacag bixinta ayaa lagu xidhaa wax-soo-saar qeexan.

### 3.10.2. Qandaraas waqti ku xidhan

Qandaraaska waqtiga ku xidhan waxa aad loogu isticmaalaa daraasadaha culus cilmi ahaan, kormeerka dhisme, La-talinta adeegyada farsamo, iyo hawlaha tababarka. Waxay ku habboon tahay:

a) Meelaha ay adag tahay in la qeexo baaxadda adeegyada, ama inta la-taliye loo baahan yahay si ujeedo loo gaadho;
b) Marka waqtiga adeegyada si sax ah loo qeexi karo, iyadoo natiijaduna tahay wax yar oo ka mid ah ujeedada hawsha;
c) adeegyada ayaa la xidhiidha hawlo kale oo waqtiga la dhameeynayaa ay isbedeli karto.

Lacag bixintu waxay ku saleysan tahay mushaar (qiime saacadle lagu heshiiyey, maalinle, todobaadle, ama bille) iyo kharshyo la isku celinayo oo ku saleysan kharashkii runta ah ee la galay iyo/ama qiime shey oo lagu heshhiyey. Qandaraaska waqtiga ku xidhan waa in Degmadu aad u kormeerto oo ay u maamusho si loo hubiyo in hawluhu u socdaan si wacan, iyo in lacagaha ay dalbanayaan la-taliyayaashu ay sax yihiin..

### 3.10.3. Qandaraas khimadda iyo/ama ku-talogal (Guul) fee contract

Qandaraasyada khidmadda iyo ku-talogalka waxa badanaa la isticmaalaa marka la-taliyayaashu (bankiyada ama shirkadaha maaliyadda) ay fulinayaan hawl maaliyadeed oo gaar ah sida shirkad la iibinayo, kuwa isku biiraya , ama hawlaha lagaga dhigayo kuwa gaar loo leeyahay. Lacagta la-taliyaasha waxa ka mid ah khidmad ah iyo lacagta guusha hawsha, oo lagu cayimo boqolkiiba qiimaha lagu gado hantida .

### 3.10.4. Qandaraasyada boqolkiiba ah (percentage)

Qandaraasyada ku xidhan boqolkiiba waxa la isticmaala meelaha ay habboon tahay in la isku xidho lacagta la bixinayo & qiimaha qandaraaska. Qandaraasku si cad ayuu u qeexaya qiimaha oo dhan taas oo

boqolkiiba inta uu leeyahay laga xisaabinayo. Isticmaalka Qandaraasyada ku xidhan boqolkiiba ee dhinaca adeegyada dhismaha waxa la ogolyahay haddii uu ku fadhiyo qiime go'an oo uu daboolayo adeegyada.

#### 3.10.5. Qandaraasyada adeegyo aan xaddidneyn (heshiis qiime).

Qandaraasyadaas waxa la isticmaalaa marka loo baahan yahay adeegyo gaar ah oo loo yeedho marka loo baahdo si ay talooyin ama adeegyo looga helo. Xadiga iyo waqtiga loo baahan yahey ma aha mid la sii cayimi karo. Kuwan waxa caadiyan loo isticmaalaa si loo heysto la-taliyeyaal marka la fulinayo mashruuc weyn . Waa khubaro dhinaca xallinta khilaafyada ah, dhinaca dib u habeynta hay'adaha , kalla talinta dhinaca Waxgadashada. Mudadoodu waa sannad ama ka badan. Degmada iyo shirkadu waxay ku heshiiyaan sida lacagta loo siinayo.

### 3.11. ISTICMAALKA LA-TALIYAYAAL KALI-KALI AH (USE OF INDIVIDUAL CONSULTANTS)

La-taliye kali ah waxa loo dirtaa hawlaha aan u baahneyn kooxo shaqaale ah; ama taageero xirfaded oo dheeri ah ; oo waaya-aragnimada iyo aqoonta qofka kaliyihi ay tahay muhimadda weyn.

La-taliyaha kaliya waxa lagu xushaa aqoontiida hawshaas. Xulashadu waa lagu saleyn karaa iyada dadka kale la warsanayo, ama la isbarbardhigayo aqoontooda.Kuwa markaa daneynaya ayaa toos loo tegaa. Kuwa degmooyinku ay xushaan waa iney lahaadaan aqoontii ku habooneyd fulinta hawalaha loo dirayo. Kartida waxa lagu qiimeeyaa heerka aqoonata iyo waaya-aragnimada, aqoontooda xaaladaha deegaanka iyo dhaqanka , nidaamka maamulka, iyo qaab-dhismeedka dawladda, iyo afka lagu hadlayo.

# 4. QORSHEYNTA WAXGADASHADA IYO MIISAANIYADDA

## 4.1. QORSHEYNTA WAXGADASHADA

Qorshe ku filan oo Waxgadashada iyo kala mudnaanta baahiyaha ee Degmada ah ayaa shuruud loo baahan yahay u ah Waxgadashada waxtarka leh , sababaha soo socda awgood:

a) Maaliyadda loogu talo-galay Waxgadashada ayaan ku fillaaneyn iney daboosho dhammaan baahiyaha, markaa maaliyadda yar ee hayo waa in lagu fuliyaa baahiya mudaanta leh ee Degmada intaan lagu bixin Waxgadasho aan muhimad badan laheyn.

b) Qorsheynta Waxgadashada waxa lagaga gudbaa xaalado ay dhici karto in Waxgadashada loo fuliyo si qarbaqarbo ah oo degdeg ah iyada oo qaabab aan habbooneyn la isticmaalayo . Weliba qorsheyntu waxay kaa caawisaa inaad ka baxdo Waxgadasho la qeybiyey si looga leexdo isticmaalka qaab Waxgadasho oo habboon . Kala qeybinta waxa la ogolyahay kaliya marka ay keeneyso ka soo qeyb-galka tiro badan oo adeeg-bixiyayaal degmada ah. Qorsheynta waxtarka lihi waxay sahashaa in la isku daro baahiyaha, si loo sameeyo hal Waxgadasho oo weyn oo qiime jaban leh, halkii dalabaad badan loo sameyn lahaa alaabo isku mid ah .

c) Waxgadashada alaabada caadiga ee degmooyinka waa la isku dari karaa si loo bixiyo qandaraas lix bilood ama sannad ah si loo dhimo waqtiga ku baxa Waxgadashooyin kala gooni-gooni ah .

d) Daabacaadda qorshe Waxgadasho oo sannad ah , waxay ganacsatada u ogaalneysaa iney baahiyaha si waxtar leh uga jawaabaan.

Qorshe habeysan oo Waxgadasho , wuxuu muhiim u yahay diyaarinta miisaaniyadda sannaka iyada oo siinaya Guddigas qandaraaska nidaam ay ku hubiyaan Waxgadashada ay ansixinayaan , iyo iyadii oo saamaxeysa kormeerka WAG ee hawlaha Waxgadashada.

## 4.2. NIDAAMKA DIYAARINTA MIISAANIYADA

Miisaaniyadda sanadka waxa loo diyaariyaa si waafaqsan habka miisaaniyadda ee degmooyinka. Xoghayaha Fulinta ayaa leh mas'uuliyadda iskuduwidda ,diyaarinta miisaaniyadda degmada, oo ay ka mid tahay qorshaha Waxgadashada. Qorshaha Waxgadashada waxa diyaarintiisa lagu saleeyaa baahiyaha shaqooyinka ku jira miisaaniyadda iyo qorshaha shaqada .

Diyaarinta qorshaha Waxgadashada ee sannadka waa in la bilaabaa saddex bilood ka hor inta uuna bilaabmin sannadku, si waqti ku filan loo siiyo qorshe macquul ah oo sax ah in la isku dubarido.

### 4.3. SHAQOOYINKA GUDDIGA QANDARAASYADA

Guddiga qandaraasku waxay leedahay mas'uuliyadda guud ee hubinta diyaarinta iyo ansixinta qorshe sanadeed faahfaahsan oo Waxgadasho , iyaga oo ka hoos shaqeynaya Xoghayaha Fulinta. Hawsha isku dubaridka, qiimeynta, kala-mudaanta kharashka qorshaha Waxgadashada waxa fulinaya unugga Waxgadashada.

Guddiga qandaraaska hawlaheeda diyaarinta qorshaha Waxgadashada ee sanadka waxa ka mid ah: faridda unugga Waxgadashada inuu bilaabo diyaarinta qorshaha Waxgadashada ee sanadka; kadibna ay eegaan oo ay soo jeediyaan wax ka bedel haddi loo baahdo, iyo ansixinta qorshaha Waxgadashada ee sanadka iyo u gudbinta nuqul WAG.

### 4.4. UNUGGA WAXGADASHADA SHAQOOYINKIISA

Unugga Waxgadashadu wuxuu leeyahay shaqada iskudubaridka qorshaha Waxgadashada ee sanadka oo qiimeysan taas oo uu ka soo ururinayo waaxyaha , unugyada iyo mashaariicda Degmada. Unugga Waxgadashadu wuxuu mas'uul ka yahay soo saaridda awaamiir faahfaahsan oo ku socota madaxda waaxyaha, unugyada iyo mashaariicda oo ku saabsan qaabka iyo sida ay u soo qoranayaan qorshahooga Waxgadashada.

Mas'uuliyada kale ee unugga Waxgadashada ee la xidhiidha diyaarinta qorshaha Waxgadashada sanadka waxa ka mid ah:

a) Qabashada baahiyah la soo gudbisto, hubinta tirooyinka & qiimaha , helidda caddeymaha ay dalbadaan, tafatiridda iyo iskudubaridida wixii la soo gudbistey isaga oo ka sameynaya qorshe dhameystiran oo Waxgadashada .
b) U soo bandhigidda Guddiga qandaraaska qorshaha Waxgadashada sanadka, si ay dib ugu eegaan una ansixiyaan.
c) Ku sammeynta qorshaha wixii isbedela ah ee ka yimaad Guddiga qandaraaska
d) Diyaarinta qorshaha Waxgadashada sanadka ee kama dambeysta ah iyo u bandhigidda Guddiga qandaraaska si ay u ansixiyaan.
e) Ogeysiinta madaxda waaxyaha, unugyada iyo mashaariicda qorshaha Waxgadashada la ansixiyey iyo miisaaniyadda Waxgadashada sannadka .

### 4.5. MADAXDA WAAXYAHA

Madaxda waaxyaha waxa looga baahan yahay iney hubiyaan tafatirka iyo diyaarinta qorshaha Waxgadashada sanadka ee xafiisyadooda iyo kuwa hoos yimaad .

a) Dhammaan Waxgadashada qalabyada, shaqooyinka iyo adeegyada ee sannadka soo socda waa in la sii tilmaamaa oo la galiyaa jadwalka qorshaha Waxgadashada ee sanadka .

b) U soo gudbinta unugga Waxgadashada, qorshaha Waxgadashada, iyada oo la tilaamayo lacagta & tirada Waxgadashada sannadka cusub .

c) Ka jawaabidda su\aalaha ka yimaadda sarkaalka Waxgadashada ee baahiyaha ku jira qorshaha.

d) Helidda ogeysiiska ku saabsan qorshaha kama dambeyska ah ee Waxgadashada sanadka ee la ansixiyey taas oo ay u isticmaalayaan tilmaan ay raacayaan markay gulinayaa waxgashada sannadka cusub.

# 5. DIYAARINTA IYO ANSIXINTA DUKUMENTIGA QANADAASYADA

## 5.1 TILMAAMIDDA BAAHIDA

Baahidu waxay ka timaadaa bakhaarada , si loo keeno alaab , ama waxay ka timaadaa waaxyaha, qeybaha ama mashruuca Degmada iyaga oo dalbanaya qalabyo, shaqooyin ama adeegyo. Kharashka caadiga ee baahida waxa lagu sii daray qorshaha sanadka ee Waxgadashada ee la ansixiyey & miisaaniyadda. Sarkaalka Waxgadashada ayaa qiyaas qiimaha ah sameeya isaga oo ku fadhiisinaya qiimayaashii hore ee Waxgadashooyinka iyo sarifka suuqa; wuxuu tilmaamaa meesha laga maalgelin lahaa, wuxuuna hubiyaa in baahida lagu dari karo kuwa kale si looga dhigo qanadaas soo jiitaa qandaraaslayaasha.

## 5.2. SIFAHA BAAHIDA

Baahida waa in si buuxda loo tilmaamaa,iyada oo la sheegayo sifaheeda farsamo, naqshada, sawirka, iyo ujeedada waxa lagu qabanayo haddii laga maarmi waayo. Sifahu waa inuu noqdaa ku guud oo ka wada dhexeeya, waana inuuna noqon magaca sheyga, moodelka, lambarka buugga ama calaamadda ganacsiga, marka laga reebo meelaha looga maarmi waayo iney isku mid yihiin mishiino jira ama qalab jira. Hadddii sifo faahfaahsan aan la diyaarin kareyn , waa in talada unugga Waxgadashada la raadsadaa ama qof khibrad gaar ah u leh.

## 5.3. ANSIXINTA SIFAYAASHA, QAABKA WAXGADASHADA IYO DUKUMENTIGA QANADAASKA

Unugga Waxgadashada ayaa diyaarinaya dukumentiga qandaraaska, wuxuuna hordhigayaa Guddiga qandaraaska Degmada dukumentiga oo wata faahfaahintii & ogeysiiska qandaraaska, si ay u ansixiyaan. Ansixinta dukumentiga qandaraaska ee Guddiga qandaraaska Degmadu waxa loo baahan yahay inuu ka horreeyo xayeysiinta.

## 5.4. KU DHAWAAQIDDA QANADAASKA

Kaddib Guddiga qandaraasku (iyo deeq bixiyaha meeshii ay qabato) markuu ansixiyo qaabka Waxgadashada, dukumentiga qanadaaska iyo xayeysiiska, waa in la dhameystiraa nidaamkii farsamo iyo maamul ee ku dhawaaqidda qandaraaska.

## 5.5. SOO BIXIDDA HORE TARTAMAYAASHA

U soo bixidda qanadaaska:

a) Waxay ku habboon tahay shaqooyinka waaweyn ee dhibta badan , ama xaaladaha kharashka badan ee diyaarinta qandaraas faahfaahsam ay niyad jab u keeni karo tartanka;
b) Badiyaa waxa loo isticmaalaa warshadaha, adeegyada la ta-tashiga ah, iyo qandaraasyada furaha ku wareeji ah, naqshadaha ama maareynta qandaraasyada
c) Hubisaa ugu yeedha qanadaraaska in loo kordhiyo kaliya kuwa leh awood ku filan & hanti ;
d) Hubisaa in laga fiirsado kaliya qanadaraasyada ganacsatada iyo qandaraaslayaasha hawsha fulin kara iyada oo halkaa ka saareysa moranka ka iman kara diidmada kuwa qiimayaasha hoose leh; waayo kuwaas looma arko kuwa leh karti & aqoon
e) Waxa loogu baahdaa Waxgadashada ay maalgaliyaan deeq-bixiyayaashu.

### 5.5.1. Shuruudaha u soo bixidda hore

Sida loogu soo baxayo waxay ku saleysan tahay kartida iyo hantida qanadaaslayaasha ay ugu fulin karaan qandaraaska si wacan, iyada oo la tixgalinayo :

a) Waaya-aragnimada iyo waxqabad koodii hore ee qandaraasyo la mid ah kan;
b) Awooddooda shaqaalaha, qalab, iyo dhisme ama tas-hiiladkooda wax- soo-saar;
c) Sharciga looga baahan yahay iyo diiwaangelinta shaqadooda; iyo
d) Hantidooda Ganacsiyeed iyo maaliyadeed.

### 5.5.2. Xayeysiinta u soo bixitaanka hore

Ugu yeedhida soo bixitaanka hore ee qanadaraas gaar ah ama tiro qandaraasyo isku mid ah, waxa loo xayeysiinayaa si la mid sidii qandaraaska tartan furan. Baaxadda qandaraaska iyo qoraal faahfaahsan oo ah waxa loo baahan yahay cidda soo baxaysa ayaa xayeysiika lagu sheegayaa.

### 5.5.3. Qiimeynta soo bixitaanka hore

Guddiga farsamo waa in ay qiimeyn rasmi ah ku sammeeyo awoodda ganacsade kasta si ay u barbar dhigto shuruudihii lagu sheegay xayeysiiska.

a) Dhammaan codsadayaasha buuxiya dhammaan shuruudihii la cayimay ayaa marka hore u soo baxaya , waxaana in loo baahan yahay ansixinta Guddiga qandaraas si loogu daro kuwa soo baxay diiwaanka Degmada ee ganacsatada qandaraasyada u soo baxda marka hore.

b) Haddi ay bataan tirada ganacsatada buuxisa shuruudaha la sheegay, caqli gal ma noqoneyso in wax lix ka badan loo yeedho si ay uga qeyb galaan qanadaaska. Taasi marka ay dhacdo kuwa ugu sii wanaagsan ayaa la xulanayaa oo loogu yeedhayaa qandaraaska.
c) Ogeysii dhammaan codsadayaasha natiijadii soo bixitaanka hore iyo gelinta diiwaanka degmada.
d) Marka la dhameeyo soo bixitaanka hore, dukumentigii qanadaaska ayaa la siinayaa dhamaan intii soo baxday.

### 5.6 BIXINTA DUKUMENTIGA TARTANKA

Unugga waxgadashadu waa in uu bixiyo markiiba waraaqaha tartanka kaddib daabacaadda koowad ee ogeysiiska qandaraaska, waana in la siiyo dhamaan ganacsatada, qandaraaslyaasha ama adeeg bixiyayaasha soo qorta inay ka qayb-galaan tartanka. Waraaqaha tartanka waa la iibin karaa si loo soo celiyo kharashka ku baxay daabacaada. Laakiin qiimaha lagu iibinayo waa inuu noqdaa intuu ku baxday daabacaadiisa , wax macaash aan lagu darin. Sicirka la gadayo waraaqaha tartanka waxa ansixinaya guddiga qandaraaska ka hor inta aan lagu dhawaaqin tartanka.

### 5.7. BIXINTA CASUUMADAHA TARTANKA XADIDAN IYO QAABKA CODSIGA QIIMAHA

Waraaqaha tartanka waa in isku mar la siiyaa dhammaan tartamayaasha liiska kooban ku jira ee ka qeyb galaya qandaraaska qaabka xadidan iyo codsiga qiimaha ama tartamayaal hore ugu soo baxay qaabka tartanka furan . Gacanta ayaa looga dhiibayaa, ama boosta ayaa loogu dirayaa iyada oo diiwangeshan, waana laga soo saxeexayaa iney heleen..

### 5.8. FAAH-FAAHINTA KU SAABSAN QANDARAASKA

Mudada waxii faah-faahin ah la soo codsan karo, waxay ku caddahay waraaqaha tartanka. Codsiyada faah-faahin doonka ah ee mudadaas kaddib la keeno, waxba laga soo qaadi maayo, haddii aanay aheyn tilmaameyn qalad khatar ah oo waraaqaha tartanka ka muuqda. Si kastaba ha ahaatee, jawaabta kasta oo la siiyo tartame, waa in iyagana a siiyaa dhamaan tartamayaasha qaatay waraaqaha qandaraaska, laakiin la sheegi maayo tartamaha soo weydiistey caddeynta. Degamdu waxay kaga jawaabeysaa codsiyada faahfaahinnada sadex maalmood oo la shaqeynayo guddahood, oo ka dambeysa helitaanka codsiga si tartamaha loo siiyo waqti ku filan oo jawaabta ugu daro diyaarinta qandaraaska.

Mararka qaarkood waxa tartamayaasha loogu yeedhi karaa inay ka soo qayb-galaan shir ka horeeya ka kan qandaraaska oo loo yaqaan shirka hanuunita, si loo helo xogta hordhaca ah oo la xidhiidha mashruuca ama tartanka iyo in wixii fah-faahin ee tartamayaashu u baahan yihiin la siiyo. Tartamyaashu waxay weydiin karaan suáalo ku saabsan qandaraaska, waxaanay xaq u leeyihiin inay maqlaan jawaabaha laga bixinayo suáalo la weydiiyey. Unugga waxgadashada ee degmadu waa inuu diyaariyaa qodobadii shirka hanuuninta, oo wada siiyo isku mar dhamaan tartamayaasha ka soo qayb-galay tartanka, oo ay ku jiraan kuwa aan iman shirka. Qoraalka qodobada shirka waa in lagu gaadhsiiyaa sadex-maalmood oo la shaqeynay gudahood..

### 5.9. KORDHINTA MUDADA UU XIDHMAYO TARTANKU

Taariikhda xidhitaanka soo xereynta qandaraaska waa la dheereyn karaa marka ay sidaas go’aamiyaan guddiga qandaraasku sababo suurta gal ah ama lagu qanci karo awgeed. Sababahaas waxa ka mid noqon kara:

Beddelaad lagu sameeyo waraqaha qandaraaska, ka dib marka bixiyo, taas oo uga baahan tartamayaasha raadin ama hawl ;

Codsi waqti kordhin oo ka yimaadda labo ama wax ka badan ; iyo

Hawlo maamul oo aan hore loo ogeyn oo khasba in dib loo dhigo furitaanka qandaraaska..

Ka dib marka Guddiga qandaraasku ay ansixiyaan waqti kordhinta, sarkaalka wax gadashadu waa inuu hubiya taariikhda cusub ee xidhitaanka , waana inuu ogeysiiya Guddiga Furitaanka Qandaraaska taariikhda ugu dambeysa ee soo gudbinta qandaraaska. Sarkaalka waxgadashadu waa inuu qoraal ku ogeysiiya dhammaan tartamayaasha taariikhda cusub ee keenista tartanka u dambeysa , waaana inuu nuqulo dhigaa dhammaan xidhiidhka galka ku haboon waxgadashada.

### 5.10. JOOJINTA TARTAN KA QANDARAASKA KA HOR FURITAANKA

Socodka qandaraaska waa la joojin karaa waqti kasta oo ka horreeya inta aan la gaadhin xiliga kama dambeysta ah ee soo gudbinta qandraasyada marka la helo ansixinta Guddiga Qandraaska. Ogow in waxgadashada ay maalgalinayaan deeq-bixiyayaashu waa in iyaga lala tashada inta aan la joojin tartanka qandaraaska. Sababaha keeni kara joojinta waxay yihiin:

a) Baahida wax soo-gadashada oo laga maarmay ama si aad ah isu-beddeshey;
b) Dhaqaale yari aan dabooli Karin wax soo-gadashada;
c) Marka ay si aad isu-beddelaan fahfaahinta farsamada, xaladaha tartanka, xaladaha qamadaraaska ama faahfaahin kale, sida baahida in dib loogu noqdo habka wax u socdaan.;

d) La waayo in ku filan ama tartamayaasha la helay oo aan buuxin shuruudii;
e) Marka la ogaado in qaar ka mid ah tartamyaashu isku dhacayaan; ama
f) Joojinta oo loo arko inay ku jirto danta qaranka dhinaca nabad-gelyada..

Marka qandaraaska la joojiyo xiliga furitaanka ka hor, degmadu waa inay joojintaas ogeysiisaa dhammaan tartamayaasha gatay ama helay waraaqaha qandaraaska. Haddii uu jiro tartame soo gudbiyey qandaraaskiisa, waa in loo celiya iyada oo aan la furin.

# 6. QABASHADA QANDARAASKA IYO FURITAANKA QANDARAASKA

## 6.1. QABASHADA QANDARAASKA

Dhamaan tartanka qandaraaska waa inuu qabtaa unugga waxgadashadu, ku qoraan diiwaanka loogu talogalay qabashada qandaraasyada (Diiwaanka qandaraasyada) dabadeedna ay ku ridaan sanduuqa qandaraasyada oo xidhan ama in la dhigo xafiis ammaan ah inta la furayo. Xiliga kama dambeysta ah ee soo gudbinta waxa hore u go'aamiyey guddiga qandaraasku, dhamaan tartamayaashana waa la gaadhsiiyey waqtiga. Trataanka qandaraaska ee la qabto iyada oo uu ka dhacay xiliga xidhitaanku, lama furayo, lamina tixgelinayo waana in lagu celiya tartamihii soo gudbiyey.

## 6.2. FURITAANKA TARTANKA

Furitaanka tartanku waa inuu bilaabmaa isla marka uu dhamaado xiliga keenista dukuemniga qandaraasku, hawsha oo dhan waa in lagu dhameeyaa isla fadhigaa. Dhamaan tartamada qandaraaska ee la soo gudbiyey ka hor xiliga xidhitaanka , waa in dadka hortooda lagu furaa iyada oo ay joogaan dhamaan tartamayaashu ama wakiiladooda. Dhamaan magacyada dadka iyo hayádaha ka soo qayb-galay furitaanka waa inuu diiwaan geliya Xoghayaha Guddiga qandaraasku.

Halkaa furitaanka , waa in dadka ka soo qayb-galay loo sheegaa, magaca tartamaha, qiimayaasha iyo wadarta guud ee qiimaha, qoralada ogeysiinta, ama kuwa ka noqda, ka dhimida ama fahfaahinta kale wixii guddiga qandaraasku u arko muhiim. Isla faahfaahin noocaas ah ,waa in loo gudbiyaa tartamayaasha ka soo qeyb galay tartanka ,laakiin furitaanka aanay cid ka joogin hadday sidaas codsadaan. Xooghayaha guddiga qandaraasku waa inuu keydiya qoraalada furitaanka tartanka.

*{Fiiro: Marka uu tartranku yahay qaabka labada gal ee uu midna yahay kan farsamada kan kalena uu yahay ka qiimaha ee hawlaha La-talinta, waxa horta la furaya kan farsamada si loo qiimeeyo. Galka qiimaha waa la heynayaa isaga oon la furin, ilaa furitaan labaad oo dadweynaha hortiisa , marka la furayo kuwa ku guuleysta dhibcaha ugu yar ee laga rabo dhinaca farsamada. Marka la furayp galka qiimaha, faahfaahinta iqiimaha laguma sheegayo}*

## 6.3. JOOJINTA TARTAN QANDARAAS IYO CODSI QIIME KADDIB MARKA LA FURO TARTANKA

Tartanka iyo Codsiga Qiimeynta (CQ) waa la joojin karaa marka ay sidaas soo jeediyo madaxa waaxda ku shaqo leh, ee ay ansixiyaan guddiga qandaraasku,:

- Haddii uu soo qorto hal tartame kaliya, ama haddii la diido dhamaan ,mid kaliya mooye;
- Haddii inta badan tartanada agu soo raaciyo shuruudo aan la aqbali karin; ama
- Guddiga qandaraasku xaqiijaan ay in qiimaha tartamaha ugu hooseeya uu ka sareeyo miisaniyadii loogu talo galay.

Inta aan la joojin tartanka iyo codsiga qiimayaasha , sarkaalka waxgadashdu waa inuu ogolaansho ka helaa madaxa waaxda ay khuseyso iyo guddiga qandaraaska si loo joojiyo tartanka/Codsiga qiimeynta, dabadeedna uu tartamayaasha ogeysiiyaa in joojay tartankii. Sarkaalka waxgadashadu waa inuu goáan ka gaadha in tartanka la wada joojinayo ama in dib loo bilaabi doono, iyo qaabka lagu wadayo. Haddii waxgadashada la sii wadayo, Sarkaalka waxgadashadu waa inuu dib u gudbiyaa dhamaan waraaqaha tartanka Sarkaalkii ay ka soo baxeen si uu dib isugu soo habeeyo tafsiisha, ama uu soo diyaariyo dukumentiga tartanka eek u habboon qaabka waxgadashada ee lagu soo taliyey.

### 6.4. KORDHINTA MUDADA TARTANKA

Mudada uu jirayo qandaraasku waxay ku caddahay waraaqaha tartanka, waana in tartame kasta uu sidaas ku xaqiijaa dokumentiga tartanka saxeexan ee uu soo gudbinayo. Qabadaraaska lagu soo sheego muddo ka gaaban mudadii loogu talo galay, waxay qeybtii waxgadaneysey ku diideysaa inuu yahay mid aan anfaceyn. Haddii se ay dhacdo inaan qandaraaska aan lagu bixin Karin mudadii hore uu socon lahaa, waa in qoraal lagaga codsadaa tartamayaasha in mudada ay kordhiyaan, iyada oo la raacayo waraaqaha tartanka. Qiimeynta iyo bixinta qandaraaska waa in lagu dhameya xiligii loogu talo galay jiritaankiisa.. Taariikhda uu dhacayo xiliga socodka tartanku waa in lala socdaa oo la bixiyaa ogeysiin laba todobaad ka hor intanay mudadu dhamaan.

Haddii, sababo aan hore loo ogeyn darteed , shaqada lagu dhameyn kari waayo mudadii loogu talo galay, qaybta waxgadashadu waa inay la xidhiidhaa dhamaan tartamyaashii si loo helo aqbalaadooda in la kordhiyo muddada tartanku. Tartamayaasha diidaa, way ka noqon karaan tartanka iyada oo aan wax khasiraad ah la saarin.

Marka la codsanayo kordhinta mudada tartanka, tartamayaasha looma baahna in laga codsado inay ama in laga ogolaado in beddelaan qiimaha ay hore u soo qorteen ama shuruudihii . Hase ahaate, waraaqaha tartanka waa inay leeyihiin qaab qiimaha wax lagaga beddelo marka codsiga mar labaad ama muddo kordhin la sameynayo, si ay uga muuqadaan isbedelkaa qiimaha waxa la keenayo mudada la kordhiyey.

Tartamayaashu waxay xaq u leeyihiin inay diidaan ogolaanshaha kordhinta muddada tartanka. Haddii u tartame diido muddo kordhinta, marka oo uu dhamaado muddadii tartanka, tartamahaas diiday looma tixgelinayo. Tartamyaasha aqbala shuruud laáan ayaa la tixgelinaya oo loo sii wadayaa qiimeynta iyo bixinta qanadaraaska.

# 7. QIIMEYNTA IYO BIXINTA QANDARAASKA

## 7.1. BALLAMINTA GUDDIGA QIIMEYNTA

Guddiga qandaraasku waxay u soo jeedinayaan Xoghayaha Fulinta magacaabida guddi qiimeyn si ay u qiimeeyso tartanka la qabtay iyo inay talooyin ka bixiyaan bixinta qandaraaska. . Guddiga qiimeyntu waa inuuna ka yaraanin sadex xubnood aananu ka badnanin shan xubnood. Marka uu aqbalo talooyinka Xoghayaha Fulintu waxa uu si rasmi ah qoraal ugu magacaabaa xubnaha guddiga qiimeynta.

## 7.2. QIIMEYNTA TARTANKA

Marka la isticmaalayo qaabka galka keliya ee tartanka, guddiga qiimeyntu waxay sameynayaan qiimeynta farsamada, waxa isla markiiba la raacinyaa qiimeynta sicirka. Marka la isticmaalayo qaabka tartanka labada gal, kan farsamada iyo kan qiimaha, qiimeynta waxa laga kala dhigaya laba talaabo oo kala duwan.

Marka hore, warbixinta qiiimeynta farsamada ayaa la diyaariyaa , iyada oo lagu raacinay talooyinka tartamayaasha gaadhay dhibcaha ugu yare ee loo baahan yahay in loogu gudbo qiimeynta galka sicirka. Marka uu ansixiyo guddiga qandaraasku ayaa dadweynaha hortooda lagu furo galalka sicirka. Guddiga qiimeyntu waxa uu isku darayaa qiimeynta farsamo iyo tan sicirka ka dibna waxa uu talo ku bixinayaa cid la siinayo qandaraaska.

## 7.3. KADIB MARKA TARTANKA LAGU SOO BAXO

Tartamaha ugu qiimaha yar ee ku soo baxo, ayaa qiimeyn lagu sameeynayaa awoodiisa farsamo iyo tan hantiyeed ee uu fulin karo qanadaraaska. Iyada oo la raacayo shuruudihii lagu tilmaamay waraaqaha tartanka, ayaa dib u eegidani waxaa lagu darayaa qiimeynta maaliyadda ah iyo tan hantida ma-guurtada ah ee tartamaha ee u suurta gelin karta inuu fuliyo qandaraaska, iyo culeyska shaqo ee uu imika hayo.

Kadib marka uu tartame soo baxo, shuruudaha dib u eegista, waxa lagu sheegayaa dukumentiga la weydiisanyo, waxaana ka mid ah:

a) Waaya-aragnimada iyo fulinta mashariic la mid ah qandaraaskan;
b) Aqoonta uu u leeyahay xaaladaha shaqo ee degaanka;
c) Awooda la xidhiidha shaqaalaha, qalabka, iyo alaabta dhismaha ama warshadeynta ;
d) Awooda dhaqaale;
e) Dacwooyin u diiwaangashan; ama

f) Wixii shuruud kale ee muhiim ah.

Haddii hawsha soo bixidda la fuliyo, tartamaha ugu qiimaha yaraa waa in lagu taliyaa in la siiyo qandaraaska, haddii aanay tartamaha awoodiisu aad hoos ugu dhicin ilaa markaa, ama aanu tartame helin shaqo kale oo hoos u dhigaya karta awoodiisa wax-qabad. Haddii hawsha soo bixidda aan la fulin, tartamaha ugu sicirka yar, waa in dib u eegid lagu sameeya iyada oo la raacayo sida uu qeexayo habka dukumentiga tartanka.

Haddii tartamaha ugu sicirka yari uu ku dhaco dib-u eegidda, tartankiisa waa in la diida, waxaana dib u eegid lagu sameynayaa tartamaha ku soo xigey. Haddii uu ku guuleysto, tartamaha waxa la siinaya qandaraaska. Haddii kale waxa loo gudbaya kan ku xiga oo dib u eegis lagu sameeynayaa. Sidaas ayaanay ku soconeysaa. Diidista tartame lagu reebo kala saarida , waxay u baahnaaneysaa sababeyn aad u muhiim ah, oo si cad loogu xuso qoraalka qiimeynta ama lagu lifaaqa wabixinta qiimeynta. Taariikh hawl-fulineed oo xun, waxay noqon kartaa sabab wanaagsan oo lagu reebi karo deb u eegidda, haddii aanu muujin tartamuhu inuu qaaday talaabooyin uu wax kaga qabanayo mashaakilkiisii hore.

### 7.4. WARBIXINTA QIIMEYNTA IYO TALOOYINKA

Guddiga qiimeyntu waxay diyaarineysaa warbixin ku saabsan qiimeyntii tartanka iyaga oo raacinaya talo soo jeedinta guddiga ee cidda la siinayo qandaraaska. Warbixinta qiimeyntu waxa lagu darayaa wixii dukumenti ah ee loo baahan yahay sida xaashida qiimeyntii ee qof walba intuu keenay,iwm. Guddiga qiimeyntu wey soo jeedin kartaa in dhammaan tartamayaasha la diido haddii:

a) Midna noqon waayo wax la qaadan karo;
b) Dhammaan ay yihiin kuwa qaali ah marka la barbardhigo qiyaastii qiimihii la sammeeyey;
c) Midna noqon waayo ku aqoon u leh;
d) La dareemo in meesha tartankii ka maqan yahay,(maqnaanshaha tartamidda laguma go’aamin karo tirada tartame kaligeed)

Lacagta qanadaraaska lagu taliyey in la bixiyo, waa qiimaha uu keenay tartamihii qiimeynta ugu fiicnaa oo sida uu dhigayo dukumentiga tartanka qandaraasku loo hagaajey wixii sixitaan ah, wax ka dhimis, iyo ogolaansho mid kale oo ah kii qiimeynta ugu hooseey.

### 7.5. ANSIXINTA GUDDIGA QANDARAASKU EE TALO-SOO-JEEDINTA BIXINTA QANDARAASKA

Guddiga qandaraaska ee ku haboon ayaa dib u eegaya warbixintii qiimeynta iyo talooyinkii uu bixiyey guddiga qiimeyntu. Inta aanay ansixin, guddiga qandaraasku waxay hubinayaan in ay jiraan wax cabashooyin qoraal ah oo ay sameeyeen tartamayaashu oo ku saabsan qaabka tartanka loo furay oo ay dib u eegayaan kana jawaabayaan.

Nuqul cabashada ku saabsan iyo jawaabtii ayaa loo dirayaa Xoghayha a Fulinta iyo ogeysiin oo la siinayo Wasaaradda Aarrimaha Gudaha. Haddii ay cabashadu muujiso ku xad gudub habka ama dhaqanka wanagsan , ama ay amarto WAG, guddiga qandaraasku waxa uu diidaya warbixinta qiimeynta waxaanu ku baaqayaa dib u qiimeyn ama dib u tartan sida ay u badan tahay.

Guddiga qandaraasku waxa uu qandaraaska siinaya tartamaha soo gudbiyey qiimaha ugu yar ee saxa ah, ee la caddeyey inuu fulin karo qandaraaska. Tartamaha lagama rabo, iyada oo lagu xidhayo siinta qandaraaska, inuu qabto shaqooyin aan ku qorneyn waraaqaha tartanka ama uu wax ka beddelo sidii uu markii hore u soo gudbiyey tartanka.

### 7.6. DIIDITAANKA TARTANKA OO DHAN

Haddii Guddiga Qiimeyntu ku taliso in la diido dhamaan tartanka, guddiga qandaraasku waa inay ka fiirsadaan :

a) Inay baahiyaan ogeysiinta si loo helo tartamayaal badan, haddii sababta diiditaanku ay aheyd tartan laáan;
b) Inay ku baaqaan tartan cusub oo ay gelayaan shirkadihii hore loo soo xulay, haddii sababta diiditaanku ahaa inaanay si fiican uga soo jawaabin;
c) Haddii tartamaha ugu sicirka yaraa ee sida fiican u buuxiyey shuruuda uu aad uga sareeyo qiimihii horey loo dhigay qandaraaska, waa in la baadhaa sababta keentay faraqan badan ka bacdina lagu dhawaaqa tartan cusub iyada oo wax laga beddelayo tafasiishii ama waraaqihii tartanka.
d) In lala xaajoodo tartamihii ugu sicirka yaraa ee sida fiican u soo buuxiyey shuruudii si loo gaadho heshiis lagu qanco oo ku saleysan in la dhimo baaxada ama tirooyinka iyo/ama in si kale loo dhigo khatarta iyo masuuliyadaha, si loo yareeyo sicirka. Hase ahaate, haddii si aad ah loo dhimo baaxada ama wax laga beddelo waraaqaha tartanka, waxay taasi dhalineysaa dib loo sameeyo tartan si loo sugo dah-soonaan la’aanta”.

- ✓ In Guddiga Qiimeynta lagu amro inuu dib u eego sababaha keenay diiditaanka, ka dibna inta aan la sameyn tartan cusub , uu ku taliyo dib u eegidda:- ,
- ✓ Xaaladaha heshiiska;
- ✓ Naqshadeynta iyo tafsiisha;
- ✓ Baaxada heshiiska;

e) Ama wixii kale ee la sameyn karo.

## 7.7. KA WADA XAAJOODKA

Marka ay guddiga qiimeyntu ku taliyso in laga wada xaajoodo, guddiga qandaraasku waxay soo magacaabayaan xubnihi kooxda wada xajoodkaas iyaga oo u eegaya heerkooda shaqo ama khibrada ay leeyihiin, taas oo ku xidhan qiimaha iyo culeyska wax gadashda. Kooxda wada xaajoodka ee lagu taliyey waxa ansixinaya gudiga qandaraaska , waxana ka mid noqonaya xubno isku dhaf ah oo leh aqoon iyo k waaya'aragnimo, sida kuwa leh :

a) Aqoonta baahiyaha isticmaalaha;
b) Xirfadda maamulka maaliyada;
c) Xirfadda wada-xaajoodka;
d) Xirfadda waxgadashda iyo maareynta qandaraasyada; iyo
e) Xirfad farsamo oo ku saleysan waxa la soo-gadanayo.

Wada xaajood lama furi karo ilaa uu soo fasaxo guddiga qandaraasku talooyinkii guddiga qiimeynta.

**Waa inaan la ogolaanin Ka wada xaajood qiime oo lala yeesho tartmihii ugu sicirka hooseeyey, ee sida fiicanna u soo buuxiyey shuruudii tartanka, iyada oo sicirkuna ahaa kan wax lagu qiimeynayo, , isla markaasna waa inaan sina la ogolaanin in wada-xaajood laba tartame isku mar lala wada galo.**

Guddiga wada-xaajoodku waa inuu diyaarsadaa qorshe tilmaamaya arrimaha laga wada-xaajoonayo, iyo ujeedooyinka laga leeyahay,iyada oo markasta oo ay suurta gal tahayna, ujeedooyinku ay tirsan yihiin isla markaana la cayimo halka ugu sareysa iyo halka ugu hooseysa ee xadka u ah kooxda wada-xaajoodka. Guddiga qandaraaska ee ku haboon ayaa ansixinaya qorshaha wada-xaajoodka inta aan la gelin wax wada-xaajood ah.

Kooxda wada-xaajoodku waxay soo saarayaan qodobadii shirka, waxaanay caddeyn qoraal ah ka qaadanayaan tartamaha , in qodobadaasi yihiin waxii ay ku wada-xaajoodeen oo sax ah, oo run ah.
Kadibna gudigu qodobada shirka waxay u soo gudbiyaan qaybta maamulka ee waxgadashada. Qaybta maamulka ee waxgadashadu waxay talooyinkii kooxda wada-xaajoodka u gudbiineysaa guddiga qandaraaska si:

a) Ay ugu talaabsdaan bixinta qandaraaska oo la siinayo tartmihii lagu soo talo bixiyey iyadoo lagu raacinayo heshiisyadii laga gaadhay wada-xaajoodka;
b) Dib u eegid ugu sameeyaan ujeedooyinkii wada-xaajoodka ,markaasna la qabto wada-xaajood dambe, ama
c) Joojiyaan wada xaajoodka oo ay diidaan tartamaha.

Marka kooxda wada-xaajoodku ay ku taliyaan in la diido tartamaha, ama ku taliyaan in loo yeedho tartamaha ku xiga si loola wada-xaajoodo marka qaabka waxgadashda yahay tartan ama in loo yeedho tartame cusub marka qaabka waxgadashda yahay tooska ah.

Guddiga qandaraasku waa :

a) Uu Ansixin karaa talooyinkii;
b) Codsan karaa laga wada-xaajoodo kale oo qodobo gaar ah;
c) Diidi kara talooyinka ,isaga oo sababeynaya ama
d) Joojin karaa wada-xaajoodka dhammaantiiba.

Natiijada wada-xaajood la ansixiyey waa in lagu muujiyaawarqadda ogolaanshaha qandaraaska, waana in lagu daraa dukumentiga heshiiska. Marka wada-xaajoodka lala yeesho tartamaha ku xiga ama tartan cusub la sameeyo, degmadu waa inaanay dib u furin wada-xaajoodkii hore, tartmihii horena waa in qoraal lagu ogeysiiyaa sababaha keenay in la joojiyo wada-xaajoodka.

### 7.8. ANSIXINTA DUKUMENTIGA QANDARAASKA EE GUDDIGA QANDARAASKA

Marka soo baxdo warbixinta guddiga qiimeyntu, qandaraaskana uu bixiyo guddiga qandaraasku, qaybta waxgadashda waxay dhameyneysaa waraaqihii heshiiska oo ay u gudbineyso Guddiga qandraaska iyada oo ay la socdaan dhamaan wixii lifaaq ah eek u haboon si loo ansixiyo. Guddiga Qandaraasku waxa uu dib u eegaya dukumentiga heshiiska isaga oo fiiro gaar ah siinaya sida loogu soo daray wixii codsi beddel ah ee uu soo gudbiyey guddigu si uu ansixiyo warbixintii qiimeynta.

### 7.9. CABASHOOYINKA TARTAMAYAASHA

Cabashooyinka ay soo gudbiyaan tartamayaashu iyaka oo ka dacwoonaya qaabka loo furay tartanka ama qiimeynta iyo bixinta qandaraaska waa in la baadhaa, waxa ka soo baxana waa in loo gudbiyaa Xoghayaha Fulinta iyo Wasaaradda Arrimaha Gudaha. Xoghayaha Fulintu waxa uu hubinayaa in tartamuhu uu helo fursad uu arrintiisa ku soo bandhigto si uu u helo sharaxaad ku saabsan goáanada.

Marka baadhitaanku uu muujiyo in tartamuhu uu gar ku leeyahay cabashadiisa, taas oo saameyneysa bixinta qandaraaska, waa inaan qandaraaska la bixin inta xal loo helayo khilaafka. Marka ay arrimahaasi dhacaan waxa la door-bidaa in la joojiyo oo dib loo bilaabo qaabka tartanka. Haddii arrinta xal loogu waayo heer degmo, waa in loo gudbiya Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

Haddii ay canashadu ku saabsan tahay heshiis ay kala saxeexdeen degmada iyo wax-gade, qandaraasle ama La-taliye, habkani kama joojineyso tartamaha xaq uu u leeyahay inuu dacwadiisa wato isaga oo kiiskiisa gaadhsiinaya maxkamada sharciga ama raadsado dhex-dhexaadin hadii ay taasi ku jirto arrimaha qandaraaska.

### 7.10. BIXINTA QANDARAASKA IYO SAXEEXIDA HESHIISKA

Marka la soo saaro ansixinta qandaraaska ee Guddiga qandaraasa, qaybta waxgadashadu waxay dhameystireysaa qandaraaska iyada oo diyaarineysa ogeysiin oo u direysa tartmihii guuleystey taas oo gacan lagaga ridayo ama boosta loogu dirayo warqad diiwangashen, iyada oo laga codsanayo inuu yimaado si uu u saxeexo heshiiska. Isla markaas waa in la ogeysiiyaa dhamaan tartamayaashii aan ku guuleysan tartanka, iyada oo lagu dhiiri gelinayo inay tartamada kale ka soo qayb galaan. Warqadda ogeysiinta loo dirayo cidaa ku guuleysatay iyo kuwa aan ku guuleysan waxa saxeexaya Xoogahaya Fulinta.

Bixinta qandaraaska waa in lagu qoraa ugu yaraan laba wargeys oo aad loo akhristo isla markaana waa in lagu dhejiyaa “Boodhka” ogeysiinta ee xarunta degmada iyo meelaha kale caanka ah. Intaas waxa sii raaca, in sarkaalka waxgadashdu uu ogeysiiyo Wasaaradda arrimaha gudaha iyo hantidhowrka Guud bixinta qandaraaska waxaanu nuqulo saxeexan u diraya hayádahaas.

## 8. MAAREYNTA QANDARAASKA , KEENISTA IYO LACAG BIXINTA

Habsamida u maareynta qandaraaska waa muhiim si loo hubiyo in laga gaadho dantii laga lahaa hawsha waxgadashada iyo in si buuxda loo dhammeeyo waajibaadkii & hawshii qandaraaska ee labada dhinac. Qaybta waxgadashaduna waa inay hubisaa in kormeer joogtada ah la sameeyo , si loo xaliyo deg-deg ahaan wixii mashaakil ah ee soo baxa, ama tallaabo ka hortag ah la qaado marka la arko mashaakil soo socdo.

### 8.1. HABSAMIDA HESHIISKA

Heshiiska waxgadashadu waxa uu bilaabmaya marka heshiiska labada dhinac ay kala saxeexdaan. Haddii uu dokumentiga qandaraasku qorayo in heshiiska ay ansixiyaan awood ka sareysaa ama hayádda maalgelineysa, heshiiska waxgadashadu ma dhaqan gelayo ilaa la helo ansixintaas, waraaqaha heshiiskuna waa inay tilmaamayaan muddada qiyaastii ay ku qaadaneyso in la helo ansixintaas.

### 8.2. KORMEERKA IYO MAAMULIDA QANDARAASKA - ALAABTA

Kormeerka iyo maamulida heshiiska alaabta, waxa xilkeedu saran yahay Qaybta waxgadashada. La socodka jadwalka keenista alaabta, diyaarinta waraaqaha, baadhitaanka alaabta waa arrimo muhiim ah si loo hubiyo in alaabtii saxa aheyd lagu keenay mudadii loogu talo galay. Guddiga baadhitaanka iyo qabashada alaabta, oo uu magacaabayo Xoghayaha Fulintu ayaa ka masuul ah qabashada iyo baadhitaanka alaabta wuxuuna diyaarinaya warbixinta qabashada.

### 8.3. KORMEERKA IYO MAAMULIDA QANDARAASKA –SHAQO

Kormeerka maalin kasta ee qandaraaska shaqo waxa sameynaya Kormeeraha Farsamo (badiba Injineerka degmada) ama Maamulaha Mashruuca oo degmada uga wakiil ah kormeerka iyo maamulida heshiiska. Marka qandaraasku uu balaadhan yahay, taas waxa qaban kara koox injineero ah, baadhayaal, kormeerayaal tiro iwm.. Kormeeraha farsamo waxa magacaabaya xoghaya Fulinta. Haddii qayb ka mid shaqooyinka loo qaban waayo si raalli galisa Kormeeraha Farsamadu, waxa uu ku amrayaa qandaraaslaha inuu saxo meelahaas uu ku gaabiyey.

#### 8.3.1. Sheegashada shaqo dheeraad ah & kordhinta waqtiga

Haddii uu qandaraasluhu ku doodo in shaqo dheeraad ah uu qabatay oon ku jirin shuruudaha heshiiska ama qiimaha guud ee qandaraaska, waxa taas loo gudbinaya guddiga qandaraaska si uu ansixiyo. Sheegashada waqtiga dheeraad ah, oo a lacag dheeri ah ama aanay aheyn, ama lacag dheeraad qandaraasluhu rabo, waa in si deg-deg ah loo xaliyaa iyada ansixinteeda uu leeyahay guddiga qandaraasku.

#### 8.3.2. Bixinta lacagta shaqada

Bixinta lacagta qandaraayada shaqada waxay ku xidhan tahay caddeyn uu soo bixiyo kormeeraha farsamadu iyo warbixinta dhameystirka ee guddiga aqbalaada iyo baadhitaanka. Dhamaan qandaraasyada shaqooyinka, alaabta la keenay goobta shaqada, hasae ahaate aan weli la isticmaalin laguma darayo jireyso qiyaasha la ansixinayo iyo qiimaha la caddeynayo.

#### 8.3.3. Ka haynta

Lacagta ka hayntu waxay baddiba khuseysaa shaqooyinka mashaariicda ama keenista qalabka iyo makiinadaha. Inta laga haynayo dhamaan cadeymaha ama bixinta qeyb-qeyb waxa lagu xusayaa heshiiska. Marka si ku meel gaadh ah loogala wareego, qandaaslaha waxa la siinayaa lacag kale, si loo yareeyo lacagta laga heynayo boqolkiiba. Lacagta laga hayo qandaraaslaha waxa loo sii deynaya marka si habsami ah uu u dhameystiro kaddib muddada hubsashada eek u cad heshiiska .

### 8.4. KORMEERKA IYO MAAMULIDA QANDARAASKA – ADEEGYADA

Kormeerka iyo maamulida hawlaha joogtada ah ee fudud sida nadaafada xafiisyada, kireynta gaadiidka, ama qandaraaska dayac-tirka waxa qaban doona Waaxda Isticmaaleysa ama/iyo Qaybta Waxgadashada sida haddba ku haboon. Hawlaha la-talinta, heshiisku wax uu badiba tilmaamaya Maamule Mashruuc oo isagu isu-duwi doona kormeerka iyo maamulida. Heshiisku waxa uu tilmaami karaa in lacagta lagu bixinayo iyada oo lagu saleynayo inta la geliyey (waqti), wax-soos-saar, qiimaha qiyaastiiba ama khidmad. Sidaas dardeed hawlaha maamulka & kormeerku waa inay ku saleysnaadaan qodobo cayiman oo ku haboon heshiis kasta.

#### 8.4.1. Bixinta Lacag hawlaha

Lacag bixinta qandaraaska hawlaha waxa lagu sameynaya qodobo u gaar ah qandaraas kastaiyada oo loo eegayo qaansheegadka uu soo qorto qofka hawsha qabanaya. Qaybta waxgadashada (ama Maamulaha Mashruuca) ayaa hubinaya in:

a) In qaansheegtu ay tahay mid macquul ah iyada oo lagu caddeynayo xaashada waqtiga shaqada, keenista& qabashada hawl la qabtay, ama shuruud lagu tilmaamay heshiiska;
b) in laga gooyo lacagta horuumarinta qiimaha qaansheegadka ah inta aan la sameyn lacag bixinta;
c) In lacagta ka-haynta ee ku xusan heshiiska laga jaro inta aan lacagta la bixin.

#### 8.4.2. Waqtiyeynta bixinta lacagta

Degmada ayaa ka masuul ah inay lacagta ku bixiso si dhaqso ah sida uu xusayo heshiisku. Xiliyada la bixinayo lacagta iyo ganaaxa ka imanaya raagista bixinta waa inay ku xusnaadaan heshiiska.

## 8.5. HAWL SOCODKA QANDARAASKA

### 8.5.1. Kor-meerka Lataliyaasha, ganacsatada ama waajibaadka qandaraaslayaasha

La-taliyaha, ganacsatada iyo qandaraaslayaasha waxqabdkooda oo la barbar dhigayo sida lagu heshiiyey, ayaa u baahan in si joogto ah loola socdo. Qaybta waxsoogadashada ama Maamulaha Mashruuca ayaa:

a) Ku ogeysiinaya qoraal deg-deg ah gancsadaha ama qandaraaslaha meelaha uu ka liito waxbadkiisu, ee u xal lagu heshiiyey raadiyo;
b) Dhinaca La-taliye ama khabiir, arrant waxay noqoneysaa in faallo laga bixiyo warbixintiisa.
c) In si joogto ah loo cusbooneysiiyo faylka heshiiska si uu uga muuqato hawsha kormeerku;
d) In la hubiyo in Xogahaya fulinta lala socodsiiyo waxyaabaha xumaada ee waa-weyn.

### 8.5.2. Kormeerka iyo gudashada waajibaadka degmada

Heshiisku waxa uu ku waajibin karaa degmada shuruudo, haddii la raaci waayo, saameynaa waxqabadka ganacsadaha ama qandaraaslaha, waxaana ka mid ah:

a) Bixinta lacagta oo lagu bixiyo xiligeeda;
b) Ansixinta naqshadaha ama warbixinada xiliga loogu talo galay;
c) Siinta meelaha wax lagu kaydinayo ama fasxyada loo baahan yahay;
d) Arrimaha la xidhiidha adeegyada shaqaalaha ganacsadaha (tusaale, waraaqaha dal-ku-galka ama siinta xafiisyada iwm..).

Sarkaalka waxgadashadu waa inuu hubiya in dhamaan waajibaadkaas degmada loo qorsheeyo oo fuliyo si aan habsaanlaheyn.

### 8.5.3. Habsaanka waxqabadka

Keenista alaabta, shaqada dishmaha iyo fulinta hawluuhu waa inay ku dhamaadaan xiligii loogu talo galay. haddii kale, iyada oo raacayo shuruudda heshiisaa ganacsaduhuama qandaraasluhu waa in degmada si qoraal ah ku ogeysiiyaa dib u dhaca ku yimid hawsha, sababaha keenay oo faahfaahsan, iyo mudada dib u dhaca. Degmaduna waxay isla markiiba qiimeyn ku sameyn doontaa xaalada, iyadanay u taala inay u kordhiso muddada dib u dhaca, ama magdhow ha ka qaado ama yaaney ka qaadin sida hadba ku cad heshiiska.

Haddii muddada la kordhiyo labada dhinacba waxay kordhintaas ku xusayaan si rasmi ah iyada oo lagu lifaaqayo heshiiska, oo ku xidhan ansixinta guddiga qandaraaska. Raagista uu ganacsaduhu ama qandaraasluhu uu ka raago fulinta waajibaadkiisa waxay ku keeni kartaa in la khasiro dhibaatada uu geystey awgeed, haddii sidaasi ku caddahay heshiiska, marka laga reebo:

a) Raagista uu keenay arrimo deg-deg ah oo ka baxsan awooda cid-kasta;
b) Haddii aanay ku xusneyn heshiiska in wax khasiraad ah uu bixiyo;
c) In labada dhinac ay ku heshiiyaan in waqtiga la kordhiyo iyada oo aan wax khasiraad ah la bixin.

#### 8.5.4. Xallinta khilaafka

Khilaafka yar yar waxa la dhameyn karaa iyada oo si macquul ah labada dhinac uga heshiiyaan si loo saxo sababta cabashada. Cabasho kasta oo rasmi ah oo qoraal oo kaga timaadda ganacsadaha ama qandaraaslaha waa in si buuxda loo baadhaa, loona gudbiyaa Xoghayaha Fulinta si uu u fasaxo in la xidhiidho ama rasmi ah loola wada-xaajoodo ganacsadha ama qandaraaslaha.

#### 8.5.5. Joojinta heshiiska

Labada dhinaca ee heshiisku waxay xaq u leeyihiin inay joojiyaan heshiiska, hase ahaate si loo difaaco degmada waa in had iyo goor la qaata talada sarkaalka sharciga iyo Wasaaradda arrimaha guddaha haddii ay degmadu goáankaas qaadato. Marka deeq-bixiye uu maalgelinayo waxgadashada waa in laga helaa oglaanshihiisa inta aan la joojin heshiiska. Heshiisyada la iskama joojiyo iyada oo aan la eegin waxyaabaha kale ee suurta-galka ah, haddii aanay labada dhinac isla qaadan joojinta heshiiska.

### 8.6. WAX-KA BEDDELKA HESHIISKA

Wax ka beddelka heshiisku wuxuu noqdon karaa lagama maarmaan , isbeddel dhinaca sicirka ah awgeed, ama khilaaf la xalliyey , ama degmada oo codsata in la kordhiyo/dhimo baahida, ama heshiis ku yimaada in la kordhiyo mudada ama ku heshiin kordhinta ama dhimida lacagta . Wax ka beddelkaas oo dhan waa in ay ansixiso guddiga qandaraasku, si rasmi ahna loogu daraa ama lagu kordhiyaa heshiiska.

# 9. WARBIXINTA WAXGADASHADA, KORMEERKA IYO QIIMEYNTA

## 9.1. WARBIXINTA WAXGADASHADA

Warbixinada joogtada ah ee degmadu ka bixineyso wax soo gadashda waxaya muhiim u tahay qorsheynta iyo miisaaniyada waxgadahasada iyo si loo kormeero, loolana socdo oo loo qiimeeyo waxgadashada. Qaybta waxgadashada ayaa diyaarineysa waxaanay ugu gudbineysaa WAG warbixin sadex-biloodle ah. Warbixinta sadex biloodkaah waa in loo gudbiyaa golaha degaanka inta aan loo dirin Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

## 9.2. KORMEERIDA IYO QIIMEYNTA WAXGADASHADA

Kormeerka iyo qiimeynta waxgadashada waa hawl joogta ah oo ay qabanayaan degmada iyo wasaaradduba, si :

a) Loo hubiyo in waxgadashdu ay ku jirto qorshe sannedeedka;
b) Loo tilmaamo meelaha nugul ama meelaha habsaanku ka jiro waxgadashada;
c) laysku barbar dhigaan qiimayaasha & qiimaha suuqa;
d) loo qiimeeyo wax-qabadka qaybaha waxgadashda iyo guddiyada;
e) loo qiimeeyo fulinta ganacsatda iyo qandaraaslyaasha;
f) loo qiimeeyo in degmadu raacayso tilmaamahan; iyo
g) In la tilmaamo siyaabaha wax lagu hagaajinayo.

### 9.2.1. Hawlaha kormeerka iyo qiimeynta ee Wasaaradda AG

a) Inay shirar joogto ah u qabtaan dadka ay khuseyso (oo ay ku jiraan xubno ka tirsan shirkadaha gaarka) si ay uga warbixiyaan arrimaha waxgadashada iyo baadhitaanada la xidhiidha cabashooyinka & soo jeedinnada daneeyayaasha.
b) In ay dib u eegid xili-xili ah ku sameeyaan hawlaha waxgadasho ee degmada.
c) Dib u eegid iyo iney bilaabaaan tallaabo sixitaan oo kaga jawaabayaan warbixinada hantidhowraha Guud iyo hantidhowraha gudah ama hanta-dhowre dibadeed ..
d) Inay dib u eegid iyo sixitaan ku sameeyaan dacwooyinka ka yimaada tartamayaasha iyo ganacsatda.
e) Inay si joogta ah muunado uga qaadaan galaka waxgadashada oo ay warbixin ka diyaariyaan wixii ka soo baxaan, talooyina u soo gudbiyaan degmada.
f) Si joogt ah dib u eegid ugu sameeyaan qaabka waxgadashada, tilmaamaha iyo dukumentiga, soona jeediyaan talooyin lagu hagaajinayo.

g) Inay ururiyaan natiijooyinka baadhitaanada iyo talaabooyinka la qaaday oo ay warbixin sannadeed ka sameeyaan.

### 9.2.2. Shaqooyinka degmada

Guddiga qandaraaska ayaa xaq u leh inuu kormeero hawlaha waxgadashada oo uu saxo wixii khaladaad ah inta uuna ansixin shaqada waxgadashada. Talloyinka WAG waa in had iyo goor la raadsadaa haddii guddiga qandaraasku aanu hubin ku dhaqanka tilmaamaha. Xoghayaha Fulintu waa inuu hubiyaa, in dhamaan arrimaha ay tilmaanto WAG ay degmadu u fuliso si dhaqso ah iyada oo la sii marinayo Guddiga qandaraaska & qeybta waxgadashada , waana in xogta warbixinada oo dhameystiran loo ha si hantidhowrka loo tuso iyo baadhitaanka WAG.

### 9.2.3. Doorka kooxda kormeerka ee ka- faaideystayaasha

Kooxda kormeerka ee ka-faa’ideystayaashu waxay ka shaqeynayaan kormeerka & qiimeynta mashaariicda laga fulinayo deegaankooda. Shaqadan waxa ku jira kormeerka shaqada qandaraaslayaasha/ganacsatada la siiyey qandaraaska . Kooxda kormeerka ee ka-faa’ideystayaashu waxay qeyb ka yihiin kormeerka ay fulineyso Degmadu.